Digitized by Google

Digitized by Google

Digitized by Google

# HALGAN

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

JAN. FEB. MAR. 1983

- KHUDBADDII XOGHAYAHA GUUD EE XHKS EE 13 GUURADII KACAANKA

- [illegible] DALKA HOOYO
- [illegible] 2aad EE UDHIS
- [illegible] XHKS & Xisbiga H. Wadaagga [illegible]
- Shirar Axsaabta H. Wadaagga Afrika

Digitized by Google

U Halgan
Waxbarasho
Si Waxbarashadu
Halgankaaga
U Kordhiso

# HALGAN

waxaa soo saara

Codka rasmiga ah ee Golaha Dhexe XHKS oo ku soo baxa Afafka Soomaaliga, Carabiga & Ingiriiska, saddex-dii biloodba mar.

## GUDDIGA QORAALKA

1. Cabdiraxmaan Xuseen Cabdi (Guddoomiye)
2. Suleymaan Nuur Cabdi (Xoghaye)
3. Cumar Jibriil Faahiye (Xubin)
4. Cabdiraxmaan Sheekh Maxamuud (Xubin)
5. Maxamed Muumin Yuusuf (Xubin)
6. Khaalid Macow Cabdulqaadir (Xubin)
7. Cabdirashiid Cabdiraxmaan (Xubin)

## QIIMAHA:

Qiimuhu waa 5 Shilin.

Guriga Ummadda — Muqdisho, J.D.S.
S.B. 1204. Qol. Lr. 143.

Digitized by Google

# ARAGTIDA

## Dib u soo noolaynta Halgan

Wargeyska Halgan oo ah wargeys ku hadla codka Golaha Dhexe XHKS, in muddo ahna aan soo bixin waxaan akhristayaashiisii ugu bishaareyneynaa in dib loo bilaabay Halgan, isagoo wata nolol cusub, waxaan ka xun nahay kala go'ii ku dhacay Halgan.

Halgan imilika wuxuu yeeshay hoggaan cusub, markii hore wuxuu hoos imaan jiray Hoggaanka Aydiyolojiyada Golaha Dhexe XHKS, wuxuu hoos yimaadaa Hoggaanka Warfaafinta iyo Borobogaandada oo ah Hoggaan ku cusub dhismaha XHKS. Hoggaanka waxaa Guddoomiye ka ah Jaalle Cabdiraxmaan Xuseen Cabdi oo isla markaana ah Guddoomiyaha Guddiga Wargeyska Halgan.

Halgan waa seddex bille ka hadla arrimaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada, wuxuu kaloo Halgan qoraa arrimaha nolol Xisbiyeedka ah, wuxuu aragtidiisa ka bixiyaa arrimaha hadba ka aloosan dunida. Halgan wuxuu akhristayaashiisa u soo gudbinayaa wararka adduunka oo kooban.

Halgan wuxuu jalleecaa hiddaha iyo dhaqanka iyo hadba aragtida cilmiga ah. Halgan marna kama kaaftoomo fikradaha akhristayaashiisa ee wax galka ah.

Halgan isagoo xambaarsan shucuurta iyo dareenka Xisbiyiinta ayuu ummadda Soomaaliyeed ugu baaqayaa in ay gartaan qiimaha marxaladdan maanta la maraayo, taariikhdana dib u gocdaan, eegaanna waxa ka horreeya. Waqtigan kuma jirno dhismaha dalkeenna oo kaliya waxaanse maanta ina hor taalla arrin wax kasta ka mudan oo ah difaaca dalka hooyo iyo sugidda midnimada ummaddeenna. Gumeystayaasha iyo Imberiyaalistayaashu waxay wadaan dicaayado aragti gaaban, waase in ayna ina khatalin ujeeddadeenii weyneydna ina seejin.


Halgan kasta waa leeyahay ayaamihiisa kulul, waase ka gudbaa markii xoog mintid ah uu helo, una huraa nafta gaarista yoolka weyn, taariikhduna ma dafirto kuwa naftooda u waaya badbaadinta inta badan iyo jaceylka dalka hooyo.

Ilaa bartamihii sannadkii ina dhaafay cadowgu wuxuu wadaa weerarro isdaba joog ah oo uu rabo inuu ku qabsado dhulkeenna qaaliga ah, kuna dabar gooyo dadkeenna. Cadawgu wuxuu la kulmay jab ba'an waxaaha ammaan mudan ciidankeenna geesiyaasha ah waa in aan dhammaanteen garab istaagnaa ciidankeenna innagoo hubna in aan leenahay guush taariikheed.



Digitized by Google

# Difaaca Dalka Hooyo



Taariikhda ummadaha adduunka waxaa ka buuxa dhacdooyin dagaallo badan oo agu hoobto, dagaalla-daasi waxay wada saaqi karaan degaanno kala fog iyo dadyow kala duwan waxay ka dhex dhici karaan dadyow, degaan iyo derisba wadaaga.

Dagaalladu ma ahayn kuwo waligood soo jirey, waxay dagaalladu ka mid yihiin sida ay culumo bada-ni qbto ifafaalayaasha bul-shooyinka ee waqti go'an ku soo biirya bulshooyin-ka, isla markaana leh dhammaad.

Waxaan ka wadnaa da-gaallada u adeegaya ilaha iyo awoodaha siyaasadeed ama dhaqaale mar walba ma jiri jirin, mana jiri doonaan, sidaas waxaa inoo caddynaya dhaqdha-qaaqa iyo socodka aadami-ga, taasoo ah in laga gud-baayo waxyaabo badan oo mar ahaan jirey waxa lagu faano.

Inkastoo dagaallada xu-suus-dhawrka taariikhda dadka mar dhaw soo ga-leen, hddana, maanta waa waxa keliya ee ummaduhu isku baabi'iyaan, iskuna maquuniyaan. Waxaana lagu dhalan gaddiyaa de-gaanno iyo dadyow jira, maanta waxa la marayaa waqti ummdaha adduunku ay sii wada maqlayaan on-kodkii dagaalladii dhawaa ee adduunka la huwiyey.

Sida culumo badan oo uu ka mid ahaa Mr. Clause-witz ay qireen dagaalladu waa siyaasad socotay oo xoog isu rogtay, waa si-yaasad laysu mari waa-yey, karaarna dhaaftay oo fatahantay. Clausewitz si kastaba ha u fasiree waa runtii marka la eego du-lucda dagaallada, waxaa shida kooxo dad ah oo da-no ku fulinaya.

Dagaalladu waa kala duwan yihiin, waxayna ku kala duwan yihiin, waxay-na ku kala duwan yihiiin axwaashooda taariikheed, sababaha kiciya dagaalka, qaabka iyo qalabka la adeegsanayo, degaannada iyo waqtiga uu soconaayo, guulaha iyo jabka laga gaarayc, iyo ujeeddooyin-ka laya leeyahay. Da-gaallada waxaa loo adeeg-sadaa xallinta dhibaato laysu mari waayey.

Dagaalladu waxay u kala baxaan dagaal xaq ah iyo mid xaq darro ah. Dagaalka xaqa ah waxaa wada ummado la gumeys-to ama dabaqado la cadaa-diyo ama ummado si kale dibedda looga soo weera-ray, rabana inay difaac-daan xorriyaddooda iyo siyaasaddooda.

Dagaallada xaq darrada ah waxaa qaada xoogag dib u socod ah, gumeysta-yaal ah, raba inay dul da-gaan shucuub kale ama cabburiyaan oo dhiigmiir-taan dabaqado kale ama



Digitized by Google

dawlado raba inay muujiyaan kibir iyo isla weyni. Labada qaab dagaalba waayo-arag baan u nahay.

Labada kooxood ee kala wada dagaallada, labaduba waxay ku andacoodaan in koodu yahay dagaalka xaqa ah, dhinaca kalena yahay gardarroole. Miisaal dagaalladii gumeystayaashu ka oogi jireen Afrika ama wali ka oogayaan waxay ku tilmaami jireen dagaal looga hortagayo kuwa nabadda iyo xasiloonida burinaaya, waxaa hubaal ah in gumeystayaashu qiiq badan iyo bus isku qariyaan.

Si haddaba aad go'aankaaga uga qaadatid waa in aad baadhaa nuxurka dagaalka iyo ujeeddooyinkiisa. Waa in aad eegtaa xoogagga kala wada dhinacyada dagaalka, qaabka ay adeegsanayaan iyo in aad sii odorostid natiijada dagaalka ma aha guushiisa oo keliya ee saamaynta uu keeni doono, markaasna aad la safatid dhinaca xaqa.

Dagaalka xaqa ah waa dagaalka ay wadaan xoog u dagaallamaya gaarista xorriyadda iyo madaxbannaanidooda, xoog ka dagaalaya cadaadiska iyo dhiigmiiradka, xoog difaacaya ilaalinayana madaxbannaanida, siyaasad iyo haybadda ummaddooda, kana ilaalinaya gar-darroolayaal dibedda uga yimid ama dib u socod gudaha ka kacay.

Dagaal kasta oo ay wadaan xoogag raba inay kibir iyo dhul ballaarsi ku qaybsadaan ummado kale dhulkooda, iyagoo dhacaya, boobaya hantidooda, ama ay wadaan koox dib u socod ah oo u adeegaya ujeeddo fool xun, ayaa la dhahaa dagaal xaq darro ah.

Dhinaca Geeska Afrika waxaa qarniyaal ka hulaaqayey dagaallo aad u ba'an oo ka dhex socdey ummadaha xornimadoonka ah iyo gumeystayaal rabay in ay hantaan dhulalka ummadaha ku dhaqan gobolkan. Dagaalladaasi waxay lahaayeen dagaallo ay ku kacayeen gumeystayaal reer Yurub oo kama dambaystii laga saaray Geeska Afrika ayna ka xoroobeen dadka ku dhaqan JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

Waxaa kaloo wali socda dagaallo ay waddo gumeysatada Xabashidu oo ay kaga soo horjeeddo dagaalyahannada raba inay ka xoreeyaan ummadahooda gumeysigeeda. Dagaalladani wali way socdaan waxaana hubaal ah in xorriyo u dirirku ay ku guuleysan doonaan.

Dhinaca kale gumeysatada Xabashidu waxay wali waddaa dhul-ballaarsigeedii, waxayna weerarro gardarro ah ku qaaddaa dawladaha xorta ah ee deriska la ah iyadoo rabta in ay dhul ka qabsato ama joojiyaan taageerada Jabhadaha gobannimaddoonka ah, waxayna weerarradaas si isdaba joog ah ugu soo qaadaysay JDS.

Dagaalladan iyo weerarradan ay maanta innagu soo qaadday gumeysatada Xabashida iyo kuwa taageera waa dagaallo gar-darro ah oo xaq darro ah, waa dagaallo la rabo in lagu qabsado dhulkeenna xorta ah, la rabo in lagu gumeysto dhulkeenna hooyo ee qaaliga ah.

Dagaalka difaaca dalka hooyo waa waajib muqadas ah, oo laga rabo qof hooyo ama u dhashayba walba oo ku dhaqan dalka Waa waajib gaaraya heer kasta, wax kastana la rabo in loo huro.

Dhulka hooyo waa barta dhuleed ee ina kulmisa, samaysana noloshenna, oo aynu ku dhaqnayn sanooyin ka sanooyin dhaxashana innagu siiyeen awoowayaasheen. Waa meesha aynu ka helno barwaaqadeenna, iyo faraxeenna, kuna barbaarinno dhaqankeenna iyo sharafteenna, waa goobaha aynu ku leennahay weegaarka dunidan.

Tan iyo intii aynu jabinnay qaar ka mid ah gumeystayaashii kala goo-goostay dalkeenna ee



Digitized by Google

aynu xoraynay labo gobol oe dalkeenna hooyo ka mid ah, waxaan gaarnay guulo waxaana qabsoomay horumar xoog leh oo aan ku dabooleyno baahideenna, aynaan gaarin kumaankun sano oo aan horey u jirnay.

Waxaan leennahay waa dalkeenna, innagana isagaa ina leh, waa in aan jeclaannaa dalkeenna qaaliga ah una diidnaa fal kasta iyo fikrad kasta oo hoos loogu dhigaayo sharaftiisa.

Jacaylka dalka hooyo waa waajib laga rabo gof kasta oo innaga mid ah, jacaylka dalka hooyo wuxuu ka kooban yahay:—

1. In qofku si buuxda u jeclaado dalkiisa iyo dadkiisa una rajeeyo horumar iyo wanaag, kuna faano dhaqankiisa uu ka dhaxlay awoowayaashii, isla markaana ay la weyn tahay dareenkiisa ummadeed, uuna naco nacabka dalkiisa iyo dadkiisa.

2. In qofka ay la weynaato u shaqaynta dalka hooyo, isagoo xambaarsan shucuurta waajibkiisa waddaniyeed, (Patriotism).

3. In uu la yimaado falal iyo fikrado ku fadhiya u adeegida dhulka hooyo, geesinnimo iyo magac weynna ka muujiyo goobaha dagaallada, kalana hortago shucuur Kacaannimo cadowga liidaya dalkiisa iyo dadkiisa.

4. In uu isku dumo dhammaan dadkiisa niyad bir ahna kala hortago, waxa dhaawacaaya sharafka iyo haybadda ummaddiisa.

5. In uu si sal iyo baar ah u naco cadoga dalkiisa iyo dadkiisa, kuna faano guulaha dadkiisa.

Waxaa hubaal ah in guushu ay raacayso geesiyada dalkooda isu dhaarsada ee u hura naftooda, cadowga adkaysi ma laha. Kuwakan ina soo weeraraya waa kuwii horay u laayey malaayiin innaga tirsan. Xorriyaddii boqollaalka sano aan doonaynay ee aan ku weynay malaayiinta innaga midka ahaa, kuna weynay hantideennii xad-dhaafka ahayd ayay rabaan inay si fudud ku dumiyaan.

Gumeystayaashu in badan ayay laayeen dadkeenna, in badanna dagaallo ayay ka holciyeen dalkeenna dushiisa iyagoo qaarna ay ku baabi'inayeen geesiyadii dadkeenna qaarna ay iyagu ku hardamayeen.

Dagaalladii ay hayeen gumeystayaasha Xabashida iyo Talyaanigu waxay ahaayeen dagaallo xaq darro ah, waxay la mid ahaayeen dagaalladii Jarmalka iyo Ingiriiska, ama Ingiriiska iyo Faransiiska, Isbaanishka iyo Bortaqiiska oo dhammaan wada doonayey inay adduunka ku kala qaybsadaan.

Masalan, dagaalkii 1935-kii wuxuu ka kacay gumeysatada Xabashida oo rabtay xeebaha dhulkeenilaa iyo Hobyo iyo Talyaaniga oo rabay inuu asna dhul badan helo. Dagaalkan ay nagu soo qaadeen wuxuu leeyahay weji gumeysi oo ay gumeysatada Xabashidu rabto inay wali sii ballaarsato dhulkeenna ay gumeysato sii waddana baabi'inta iyo dabar goynta ummaddeenna. Waxaana markhaati inoo ah khudbaddii yaqyaqsiga lahayd ee Madaxa burcadda Ruushka u adeegta ee Addis-Ababa ka talisa uu ka jeediyey Madaxda Afrika hortooda shirkii Libraville ee 1977kii ee uu ku yiri «Ma rabo oo keliyo in aan burburiyo ciidanka iyo magaalooyinka Soomaaliyeed ee waxaan rabaa inaan dhulka dushiisa ka tirtiro magaca Soomaaliyeed».

Taasay ku taamayaan Xabashida iyo Imberiyaaliyadda cusub ee rabta in ay dunida ku habsato, waxaanan arki karnaa eraygii uu yiri: Safiirka Ruushka u fadhiya magaalada Sanca 1977kii «Soomaaliya annagaa dhisnay annaga ayaana duminayna, annaga ayaa jilbahannaga soo hoos dhigi doonna». Waa kibirkii jabiyey Hitler iyo Jonson; waa erayo uusan dhihi karin qof haba yaraatee ay ku dambayso dhibic yar oo bani'aadminnimo ah, waa erayo



Digitized by Google

ku hadaaqaan, falaanna dhiigyo-cabyadii taariikhda guul darrada ku riday.

Dagaalkan innaga ayaa ku guuleysan doonna, waayo dagaalkeennu waa mid dadweyne, waa dagaal ay ka qayb galayaan malaayiinta qofood ee ku nool dhulkooda xorta ah dushiisa, malaaliin u halgantay, dhadhamisayna miraha xorriyadda, malaayiin aan [illegible]ggalayn in la hor istaago guushooda xorriyadeed, malaayiin ay ka garab dagaallayaan, malaayiinta walaalahood ah ee ku dhaqan Soomaali Galbeed, Abbo, Tigre, Eriteriya iyo ummadaha nabadda jecel. Waan guulaysanaynaa waayo dagaalkeennu waa xaq, waa dagaal ayna jirin meel aan uga warwareegno, waa dagaal ay nagu waajib tahay in aan is-badbaadinno. Waxay rabaan inay ina badaan dib u dhicii iyo baabi'ii walaalaheen Soomaali Galbeed oo uu ku tilmaamay qoraha buuga la dhaho «Afrika and the United States, vital interests» oo magaciisa la dhaho Mr. J.S. Whitaker «meesha ugu dib u dhacsan Bariga Afrika». Waa kuwii u bartay laynta malaayiinta qof ee walaalaheen ah, si joogta ahna isugu hambalyeeya markay dhex dabaashaan dhiigga dadkeenna, hantina ka dhigta dhaca dadkeenna.

Waxaan hubnaa in aan guulaysan doonno dhib kastaba ha laynoo gaystee. Ciidammada cadaawuhu, qalab kasta oo sarreeya ha wateene way jabi doonaan, waayo waxay ka horjeedaan qawaaniinta horumarka taariikhda bulshooyinka waxay u dagaallamayaan ujeeddooyin gumeysi oo dadweynaha ayan taageero uga helaynin, kalsoonidaa ka maqan, waayo waxay iyaga naftooduba arkaan inay mustaqbal madow yihiin, ciidammadayada geesiyada ahi iyaga ayaa guusha la hoyan doona, waayo waxay u dagaallamayaan badbaadinta ummaddooda, waa ciidan ay ka garab dagaallamayaan malaayiinta dadweynahooda ah, waa ciidan ay ku urureen ubadkayaga kuwa ugu geesisan, kuwa ugu waddan jecel, kuwa aan shaqo ahaan u gelin ee u galay naf-hurnimo iyo in ay dhidibbada u adkeeyaan xorriyadda qaaliga ah ee boqollaal sano u soo dagaallamayeen shacbiga Soomaaliyeed.

Waa ciidan ay isugu yimaadeen kuwa axdi oofinta uga adag isuguna dhaartay inayan goobaha dagaalka u kala harin, waa ciidan ay isku kalsoon yihiin askar iyo saraakiilba, waa ciidan ka kala yimid dhammaan qaybaha bulshada Soomaaliyeed, waa ciidan ka kooban agoontii waligood gumeysigu laayey, hantidoodiina muddo badan moora duugayey, waa ciidankaas ay isugu yimaadeen walaalahaah isu boholyoobay, axdigooduna yahay inay xorriyaddooda, midnimadooda, sharaftooda, siyaasaddooda iyo rabidda ummaddooda ilaaliyaan.



Ciidammadayadu waxay leeyihiin niyad bir ah, waxaana maskaxdooda iyo niyaddoodaba ka guu-



Digitized by Google

xaya shumuca xorriyadda, waxay mar kasta milicsadaan calankooda, waxay hoos u eegaan ciiddooda, waxay dib u gocdaan dhibaatooyinkii uu gumeysigu baday aabbayaashoodii ay jeclaayeen waxay leeyihiin shucuur ifaya oo ay ka guuxayso gumeysi diidnimada. Waxay hubaan inay helayaan guusha taariikheed, waxay hubaan inay xoog kasta oo gumeysigu keeno ay la mid tahay xumbo guraysa oo raadkiisu yahay jab iyo taariikh xumo, waxay hubaan in geeridoodu sharaf tahay, noloshooduna lib iyo barwaaqo tahay, waxay yaqiinsan yihiin in dalkooda iyo dadkooduba iyaga isku hallaynayaan. Waqti kasta ha qaadato, qaab kastana ha ku timaaddee, guusha annagaa leh.

Haddaba, dadweynaha Soomaaliyeedow, waxaan maanta arkaynaa kibirka xad-dhaafka ah ee dalkeenna qaaliga lagu soo weerarayo, waan aragnaa in la rabo in shumacii xorriyadda ee aan sanooyinkan badan u soo dagaallameynay la damiyo, waan aragnaa qorshaha foosha xun ee la rabo in lagu baabi'iyo gobannimaddoonkeenna, midnimadeenna iyo jiritaankeennaba. Waa innaga iyo dadnimadeenna sida aan isu difaacno, dalkeenna iyo innaga laynooma dhaxeeyo, xorriyadda maanta aan haysanno hadiyad laynooma siinin, innagaa u soo dagaallanay, calankeennu wuxuu ka dul taagan yahay dhiiggii malaayiin innaga mid ah.

Gaarista xorriyadda waxaa ka dhib badan ilaalinteeda, waa in aan ogaannaa in cadowna uusan marin karin ummad wada duuban, oo isku niyad ah, guusha innagaa leh, waa waqti dhib ina horyaallo, waase muddo gaaban oo maalmo ah, waa in aan maalmahaas mintidnaa, si aan sanooyin badan iyo qarniyaal barwaaqo ugu noolaanno.

Waa inoo guul iyo xorriyad, waa in aan adkaysi, halgan iyo midnimo ku gudubnaa waqtigan adag, innagoo hubna in aan guusha leennahay. Guusha innagaa leh.



Digitized by Google

# Nolol Xisbiyeedka:

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed isaga oo fulinaya Xeerka Ururka ayaa kaddib markay ka soo wareegtay aasaaskii Ururka muddo 5 sano ah, Muqdishona lagu qabtay shirweynihiisii 2aad, kaasoo furmay 12kii Jannaayo 1983kii, wuxuuna socday 7 maalmood.


Furitaankii shirweynaha waxaa ka soo qayb galay Madaxweyne Ku-xigeenka 2aad ee JDS Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax, Guddoomiyayaal Hoggaamo, Guddoomiye Ku-xigeenno iyo madax kale oo ka tirsan Xisbiga iyo Ururrada Bulshada.

Shirweynaha waxaa ka soo qayb galay ergooyin ka socday Iskaashatooyinka Gobollada kana koobnaa 500 oo xubnood, waxaana shirweynaha ka hor Gobollada lagu qabtay shirar Heer Gobol ah ayna Iskaashatooyinka Gobollada ka soo doodeen Ajandayaashii shirweynaha Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qodobbadii ugu waaweynaa ee shirweynaha loo soo bandhigay waxay kala ahaayeen:-

1) Warbixin guud ee Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed kuna saabsanayd wax qabadkii Ururka muddadii uu dhisnaa.

## Shirweynihii 2aad ee UDHIS



2) Kaalinta Iskaashatooyinka kaga jiraan Difaaca Qaranka.

3) Wax soo saarka iyo dhibaatooyinka hor taagan.

4) Wada shaqeynta Iskaa shatooyinka i yo Hay'adaha Dawladda.

5) Dib u habeynta Sharciyada iyo Barnaamijka Iskaashatooyinka.

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu ka kooban yahay lix Urur Iskaashato, oo ka kooban, 474 Iskaashato waxaana ku jira 61.133 Xubnood, waxayna Ururradaasi u kala baxaan:

1) Ururka Beeraha oo ka kooban 315 Iskaashato, waxayna kala yihiin 42.355 Xubnood.

2) Ururka Quudka iyo adeegga oo ka kooban 59 Iskaashato iyo 8.510 Xubnood.

3) Ururka Xoolaha iyo Keymaha oo ka kooban 33 Iskaashato 4.675 Xubnood.

4) Ururka Kalluumeysiga oo ka kooban 22 Iskaashato iyo 2.564 Xubnood.

5) Ururka Dhismaha iyo Gaadiidka oo ka kooban 26 Iskaashato iyo 1.571 Xunood.

6) Ururka Farshaxanka iyo Warshadaha yar-yar oo ka kooban 19 Iskaashato iyo 1.458 Xubnood.

Shirweynuhu wuxuu dhegeystay warbixintii Guddiga Fulinta ee Ururka, waxaa kale oo warbixinno ka soo jeediyey Hay'adaha dhaqaalaha ee dalka JDS ee xiriir la yeelan kara hawlaha Iskaashatooyinka, taas oo looga dan lahaa in lagu xalliyo dhibaatooyin-



Digitized by Google

ka haysta hawlaha Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Dhibaatooyinkii ugu waaweynaa ee laga soo jeediyey shirweynaha 2aad ee UDHIS waxaa ka mid ahaa:-

1) Adeegga Bulshada ee deegaanka Iskaashatooyinka oo hooseeya sida, Caafimaadka. Jidadka. Biyaha. Isgaarsiinta iwm.

2) In Aqoonta guud iyo tan farsamo ee Iskaashatooyinku hooseyso.

3) In maalgelinta Iskaashatooyinku aad u yar tahay.

4) In helitaanka Qalabka wax soo saarku ee Iskaashatooyinku yar yahay.

5) In qaabka bixinta Amaahda Bangiyada oo ku adag Xubnaha Iskaashatoo yinku.

6) Iskaashatooyinka qaarkood oo kala kulma dhibaato suuq gaynta wax soo saarkooda.

7) In ay jirto isu dheeltir la'aan kharajka wax soo saarka iyo qiimaha badeecadda ay soo saaraan Iskaashatooyinka.

8) Xiriirka Hay'adaha Dowladda iyo Iskaashatooyinka oo aan si habboon la isugu duba ridin.

9) Iyada oo dacaayad raqiis ah ka fidiyo rajciyadda si loo cabbuuriyo Iskaashatooyinka wax qabadkooda iyo horumarkooda.

10) Iskaashatooyinka xeebaha iyo xijiga oo had iyo jeer ka cawda raashin xumo.

11Hay'adaha dowladda qaarkood oo aan tixgelin Iskaashatooyinka marka ay bixiyaan qandaraasyada.

12) Fatahaadda Webiyada iyo Togogga oo khasaare badan u geysta wax soo saarka.

13) Iskaashatooyinka xoolaha oo aan la siin dhul ku filan si loo nagaadiyo Reer Guuraaga.

14) Helitaanka Daawada Xoolaha oo adag.

15) Iskaashatooyinka Kalluunka oo dhibaato ka haysata keydinta Kalluunka.

16) Iskaashatooyinka Quudka oo badeecadda ay u baahan yihiin aan helin Hay'adaha qaybiyaana aan mudnaan siin Iskaashatooyinka.

17) Sicirka Hargaha iyo Saamaha oo aan in dhoweyd wax laga beddelin.

18) Iskaashatooyinka Farshaxanka oo aan helin alaabta wax soo saarkoodu u baahan yahay sida Dunta, Xabagta, Kabaha Rinjiga iwm.

Shirweynihii 2aad ee Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed markii uu dhegeystay dhibaatooyinkii laga soo jeediyey shirweynahaan ayna soo jeediyeen ergooyinkii ka soo qayb galay wuxuu shirweynuhu ka soo jeediyey talooyin wax ku ool ah si loo xalliyo dhibaatooyinka Iskaashatooyinka ka haysaa xagga Qalabka, Farsamada, Aqoonta iyo wax soo saarka.

## DIFAACA QARANKA

Shirweynaha 2aad ee UDHIS isaga oo tixgelinaya marxaladda adag ee maanta dalku marayo iyo cadowga badan ee duulaanka ku soo qaaday qarannimada Ummadda Soomaaliyeed wuxuu go'aansaday qodobadan:

1) In lagu garab istaago Ciidammada Qalabka Sida ee Geesiyaasha ah ee u huray Naftooda jihaadka xaqa ah ee loogu jiro difaaca dalka naf iyo maalba.

2) In la dhiso guddiyo difaac oo heer qaran ah, kaas oo ka kooban Ururka Iskaa shatooyinka Heer Qaran ee cayima taakuleynta joogtada ah ee daafaca dalka una gudbiya Iskaashatooyinka Gobollada.

3) In Iskaashatooyinku qorshahoodu ku darsadaan diyaar garow dagaal.

4) In Xubnaha Iskaashatooyinku ay si joogta ah ugu deeqaan Dhiig Difaaca Qaranka.

Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu shirweynihiisii



Digitized by Google

2aad ka soo jeediyey cambaarayn uu dusha kaga riday gumeysiga madow ee Xabashida iyo huwanta uu cagaha ku wato oo weerar qaawan oo gardarro ah ku soo qaaday dalka Hooyo.

Wuxuu kaloo shirweynuhu cambaareeyey shir ku sheegga seddex geeseedka ah ee Tiribole, Cadan iyo Addis-Ababa. shirkaas oo salka ku haya ka holcinta dagaalo Geeska Afrika una adeegaya siyaasadda is-ballaarinta ee gumeysiga cusub ee Ruushka.

Sidoo kale wuxuu shirweynuhu cambaarayn u soo jeediyey Taliska Midab-Takoorka Koonfur Afrika boobka sahyuuniyadda ku hayso dhulka Carbeed, gaar ahaan Falastiin iyo Lubnaan.

T A A G E E R O:

Shirweynaha 2aad ee UDHIS wuxuu taageero u soo jeediyey Ciidammada Qalabka Sida, sida ay goor walba heegan ugu yihiin Difaaca Dalka iyo ilaalinta sharafta Ummadda Soomaaliyeed. Sidoo kale shirweynuhu wuxuu taageero taas la mid ah u soo jeediyey Dhaq-dhaqaaqyada gobanimodoonka ee u halgamaaya aaya ka talintooda iyo madax bannaanidooda, sida Soomaali Galbeed, Abbo Ereteriya, Tigre iyo Falastiin iwm.

B A L L A N  Q A A D

Shirweynaha 2aad ee UDHIS wuxuu soo jeediyey ballan qaadkan:-

1) In uu si **hagar** la aan ah u fulinayo go'aannadii dhaxalgalka ahaa ee shirweynihii 2aad ee X. H. K. S. baaqii Kacaankii 21ka Oktoobar 1969kii iyo tusaalooyinkii Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

2) Ururku wuxuu ballan qaaday in uu ka qayb galayo Difaaca Dalka Hooyo iyo sharafta Ummadda Soomaaliyeed isaga oo u huuraya naf iyo maalba.

3) In ay sare u qaadayaan tacab soo saarka, si wanaagsanna ugu adeegayaan bulshada Soomaaliyeed.

Shirweynaha 2aad ee UDHIS intii uu socday waxaa dalka gudihiisa iyo dibadiisaba looga soo diray dhambaalo loogu hambalyeynaayo shirweynaha labaad, looguna bogaadinayo in ay ka soo baxaan go'aanno dhaxal gal ah. Dhambaaladaas kuwii ka yimid Iskaashatooyinka Adduunka waxaa ka mid ahaa:- Ururka Heer Qaran ee Iskaashatooyinka Talyaaniga iyo Isbahaysigooda (LNCM).

Ururka Iskaashatooyinka Butiswaana, Iskaashatooyinka Beeraha ee dalka Jabbaan, Ururka Beeraleyda Kuwayt, Ururka Iskaashatooyinka Dhexe ee Iswiidhan, Xarunta Iskaashatooyinka Adduunka ee Kaydka (WUCCU), Ururka Isbahaysiga Iskaashatooyinka Adduunka (ICA), VDC ee Mareykanka, Ururka Isbahaysiga Iskaashatoo yinka Adduunka ee Gobolka Afrikada Bari iyo Dhexe, Iskaashatooyinka ee dalka Mareykanka (CLS-UA), Iskaashatooyinka Quudka ee dalka Kuwayt, Ururka Iskaashatooyinka Jarmalka Fedraaliga, Ururka Iskaashatooyinka Ingiriiska.

Shirweynihii ee UDHIS wuxuu doorty Xubnaha Guddiga Dhexe oo ka kooban 130 Xubnood iyo Guddiga Fulinta UDHIS oo ka kooban 13 Xubnood iyo Guddiyada Fulinta Heer Qaran ee lixda Urur Iskaashato oo loo aqoonsaday Ururro Heer Qaran oo iskood u madaxbannaan.

Xubnihii loo doortay Guddiga Fulinta waxay kala yihiin:-

1) Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali Guddoomiye.

2) Jaalle Yaasiin Geele Warsame Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad.

3) Jaalle Maxamed Sh. Maye Axmed Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad.

4) Jaalle Caasha Maxamed Cadnaan Agaasimaha aaxda Arri. Dibedda.

5) Jaalle Maxamed Cabdulqaadir Asad Agaasimaha Waaxda Maaliyadda iyo Maamulka.



Digitized by Google

6) Jaalle Maxamed Axmed Cumar Agaasimaha Waaxda Tababarrada iyo Waxbarashada.

7) Jaalle Maxamed Cali Axmed Agaasimaha Waaxda Qorshaynta iyo Suuq gaynta.

8) Jaalle Axmed Xaashi Geedi (Farey) Agaasimaha Waaxda Abaabulka iyo Shuruucda.

Guddiga Kormeerka iyo Hanti Dhowrka ee UDHIS wuxuu ka kooban yahay sidan:-

9) Cabdullaahi Xirsi Samatar Guddoomive.

10) Axmed Maxamed Nuur (Macalow) Guddoomiye Ku-xigeen.

11) Jaamac Ciise Cabdi Xubin.

12) Cabdullaahi Warsame Maxamed Xubin.

13) Maxamed Axmed Cusmaan (Qoryooley) Xubin.

Xiritaankii shirweynihii 2aad ee Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waxaa lagu qabtay Golaha Murtida iyo Madadaalada, waxaana ka soo qayb galay Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed S/Gaas Maxamed Siyaad Barre, Guddoomiyayaal Hoggaamo, Wasiirro, Xildhibaanno, Hawlwadeenno Xisbi iyo Ururrada Bulshada.

Xiritaankii Shirweynaha waxaa khudbad qiimo leh ka jeediyey Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Siyaad. wuxuuna ugu horreyntii u soo jeediyey salaan iyo Guul Shirweynaha 2aad ee Ururka DHIS iyo dhammaan Xubnaha Iskaashatooyinka kala duwan.

Xoghayaha Guud ee X HKS wuxuu ka warramay in muddadii uu dhisnaa UDHIS uu muujiyey wax qabad ku habaysan horumarinta wax soo saarka dalka. ayada oo isla markaa xoog weyn la saaray kobcinta garaadka. aqoonta farsamada ee Xubnaha Iskaashatooyinka.

Xoghayaha Guud ee X. H. K. K. S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre ka hor waxaa halkaa hadal ka jeediyey Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka Golaha Dhexe Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali. isaga oo war bixin ka jeediyey sidii shirweynuhu u socday.



Digitized by Google

# Dib u habaynta Hoggamada & Guddiyada G/Dhexe XHKS

Iyada oo la tixgelinayo habsami uu socodka hawlaha Xisbiga ayaa Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Siyaad soo saaray Wareegto muujineysa dib u habeyn lagu sameeyey Hoggaamada iyo Guddiyada Golaha Dhexe XHKS, 15kii Jannaayo 1983.

Meeleyntaas waxaa lagu magacaabay Xubno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS iyo Golaha Shacbiga Qaranka waxayna kala yihiin:

1. Jaalle S. Guuto Maxamed Sh. Cismaan — Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda.

2. Jaalle S. Guuto Maxamed Cali Shire — Guddoomiyaha Hoggaanka Dhaqaalaha Golaha Dhexe XHKS.

3. Jaalle G. Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed — Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka iyo Kicinta G. Dhexe XHKS.

4. Jaalle G. Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar — Guddoomiyaha Hoggaanka Waxbarashada, Tababarrada iyo Isboortiga G. Dhexe XHKS.

5. Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal — Guddoomiyaha Hoggaanka Aydilojiyada G. Dhexe XHKS.

6. Jaalle Aadan Maxamed Cali — Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibadda G. Dhexe XHKS.

7. Jaalle Axmed Ashkir Bootaan — Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha G. Dhexe XHKS.

8. Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali — Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka G. Dhexe XHKS.

9. Jaalle Xamsa Maxamed Gaadaweyne — Guddoomiyaha Hoggaanka, Nabadgelyada iyo Difaaca G. Dhexe XHKS.

10. Jaalle Maxamed Cali Warsame — Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista G. Dhexe XHKS.

11. Jaalle Maxamed Jaamac Xaaji (Kore) — Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka G. Dhexe XHKS.

12. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame — Guddoomiyaha Guddiga Baarista G. Dhexe XHKS.

13. Jaalle Muuse Nuur Amiin — Guddoomiyaha Hoggaanka Caafimaadka G. Dhexe XHKS.

14. Jaalle Maxamed Cali Cabdi — Guddoomiyaha Hoggaanka Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha G. Dhexe XHKS.

15. Jaalle Cabdiraxmaan Xuseen Cabdi (Baydaani) — Guddoomiyaha Hoggaanka Borobogaandada iyo Warfaafinta G. Dhexe XHKS.

16. Jaalle Aadan Xuseen Xayle — Guddoomiyaha Hoggaanka Shuruucda iyo Caddaaladda G. Dhexe XHKS.

17. Jaalle Suleymaan Axmed Hagoog — Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Abaabulka iyo Kicinta G. Dhexe XHKS.

18. Jaalle Maxamed Cabdullaahi Cabdi (Idi) — Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Maaliyadda G. Dhexe XHKS.

19. Jaalle Maryan Yuusuf Maxamed — Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Aydiloojiyada G. Dhexe XHKS.

20. Jaalle Cabdullaahi Sh. Xuseen — Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Dhaqaalaha G. Dhexe XHKS.

21. Jaalle Maxamed Dhaqane Dhoore — Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Kormeerka G. Dhexe XHKS.

22. Jaalle Culumo Cabdiraxmaan Macallin — Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha G. Dhexe XHKS.

23. Jaalle Cabdiraxmaan Cusmaan Cumar — Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Baarista G. Dhexe XHKS.

24. Jaalle Axmed Sheekh Jaamac Guddoomiye ku xigeenka Hoggaanka Waxbarashada, Tababarrada, Isboortiga G. Dhexe XHKS.

25. Jaalle G. Sare Xasan Abshir Faarax — Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Banaadir.

26. Jaalle Maxamuud Maxamed Rooble — Kaaliyaha laad ee Xoghayaha Guddiga Xisbiga G. Banaadir.



Digitized by Google

# Kormeerka G/Dhexe ee Gobolada Dalka

Taariikhda asxaabta nooca cusubi, waxay qiraysaa marka ay hantaan awoodda hoggaaminta dalalkooda ay u dejiyaan khadka guud ee siyaasadda iyo dhaqaalaha, fulintooda na ay u sameeyaan qorshe cad oo loo raaco.

Haddaba hoggaaminta hawlahaas, waxaa kaalin laxaad leh ka qaata kormeerka fullinta hawlaha Xisbiga iyo Dawladda.

Sidaas darteed xilka Xisbiga saaran, waxan ku soo uruurin karnaa;-

1. Qorshe Dejinta Guud.
2. Ilaalinta fullinta qorshahaasi.
3. Kormeer isdaba joog ah in qorshihii loo fuliyey sidii loogu tala galay iyo in kale.
4. Ka ilaalin wax kastoo lid ku noqon kara fullinta qorshahaasi.

Waaya-aragnimada ax saabta nooca cusubi, waxay caddaynaysaa inay guulo ka soo hoyn karaan hawlahooda haddii ay tixgeliyaan arrimaha soo socdo:-

1. Waa inay ku dadaalaan in jidka siyaasadeed ee Xisbigu uu noqdo mid ku salaysan mabaadii'da H/W Cilmiga ah.
2. Waa inay dadweynuhu gartaan oo la fahamsiiyo ujeeddada laga leeyahay jidkaasi siyaasadeed si ay u taageeraan una ogaadaan inuu xiriir la leeyahay noloshooda.

Hubsashada iyo kor meeriddu waa waxyaabaha ay axsaabta nooca cusubi kaga duwan yihiiin axsaabta kale ee siyaasiga ah, ujeeddada kormeerkuna wuxuu noqonayaa u horseedid ka sii gaashaamasho khalad lagu dhaco dhinaca Xisbiga iyo Dawladda.

Kormeer, wuxuu leeyahay qawaaniin ay waajib tahay in la raaco. kuwaasoo kala ah:-

1. Waa in aanu noqon mid lala soo boodo oo laab la kac ah ee uu noqdaa mid cilmiyeysan oo qorshaysan lehna qalab iyo qaab loo fuliyo.
2. Waa inay Xubnaha Xisbiga iyo dadweynuhuba ka qayb galaan.
3. Waa inuu noqdo mid joogta ah.
4. Waa inuu waxtar u leeyahay dhinaca Xisbiga iyo Dawladaba.
5. Dadka kormeerka sameynayaa waa inay awood iyo aqoonba u leeyihiin waxay kormee rayaan.
6. Isku dheeli tirka kormarka min kor ilaa hoos.

Mar kasta oo kormeer la sameynayo waa laga ma-maarmaan inuu yeesho natiijo sidaas darteed natiijada kormeerku guud ahaan wuxuu noqdaa:-

1. Mid u baahan la talin iyo toosin keliya.
2. In xilka qofku hayaa uu ku cuslaado oo markaa in laga qaado u baahan.
3. In xilka qofku hayey mid cusub loogu beddelo.

Haddaba iyadoo arrintaan laga shidaal qaadanayo ayaa snanadiiba 2 jeer mas'uuliyiinta Xisbigu kormeer iyo socdaal ku kala bixiyaan dhammaan Gobollada dalka, Degmooyinka. Tuulooyinka iyo Degaanka reer guuraaga ku dhaqan yahay, looga dan leeyahay in had iyo jeer uu Xisbigu hoos xog ogaal ugu noqdo nolosha dhabta ah ee dadweynaha, isla markaasna si toos ah looga war qabo shacbiga si talaabooyinka Dawladda iyo Xisbigaba ka qaadayaan xagga siyaasadda iyo dhaqaalaha ay u



Digitized by Google

noqdaan kuwo ka tarjumaya dareenka iyo aragtida dadweynaha.

Kormeerka wufuudda G/Dhexe iyo Golaha Shacbiga ku soo mareen Gobollada dalka bishii Janaayo oo ahaa kormeerkii 17aad ee Xisbigu sameeyo ilaa aasaaskii Xisbiga waa midka tarjumaya fikradaha iyo siyaasadda Hoggaanka Kacaanka ku maamulayo dalka, taas oo ah mid kaalin buuxda ka qaadaneysa isku xirnaanshaha dadweynaha iyo mas'uuliyiinta. Wufuuddani intii ay joogeen Gobollada waxay si joogto ah kulammo kala duwan ula yeesheen madaxda iyo dadweynaha goobahaas iyaga oo si wada jir ah loogu falanqeeyey arrimaha nabadgelyada; difaaca, dhaqaalaha nolol Xisbiyeedka iyo guud ahaan hawlaha lagu horumarinayo dalka.

Wufuudda kormeerka sadday waxaa kala hoggaaminayey:

1. Gobolka Nugaal Jaalle S. Guuto Maxamed Cali Shire Guddoomiyaha Hoggaanka Dh. G. Dhexe.

2. Gobolka Bari Jaalle Maxamel Jaamac Xaaji Kore Guddoomiyaha G. Kormeerka Golaha Dhexe.

3. Gobolka Sanaag Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuukaal Gudd. H. Aydiyooloojiyada Golaha Dhexe.

4. Gobolka Mudug Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame Gudd. Guddiga Baarista G. Dhexe.

5. Gobolka Galguduud Jaalle Maxamed Nuur Galaal Gudd. Guddiga Siyaasadda Golaha Shacbiga Qaranka.

6. Gobolka Hiiraan Jaalle Cabdullaahi Cosoble Siyaad W. B. iyo Isgaarsiinta.

7. Gobolka J. Hoose J. Dhexe Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim Gudd. Xig. 2aad X. Xilmale.

8. Gobolka Baay iyo Bakool Jaalle Maxamuud Cali Axmed Gudd. Guddiga Shu. G. Shacabka.

9. Gobolka Gedo Jaalle Maxamed Cali Cabdi Gudd. Howlwadeennada Golaha Dhexe.

10. Gobolka Sh. Hoose Sh. Dhexe Jaalle Maxamed Faarax Ciise Wasiir Xigeenka Maaliyadda.

11. Gobolka Waqooyi Galbeed iyo Togdheer Jaalle Jaamac Gaas Macawiye Wasiiiir Ku-xigeenka Gaadiidka Badda iyo Dekadda.



Digitized by Google

# Baaqii Dhallinyarada.

## Kalfadhigii 6aad ee Guddiga Dhexe UDHKS

Fadhiga 6aad ee Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed waxaa lagu qabtay Magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Muqdisho 15-16.1.83, fadhiga wuxuu ku ansaxmay ka soo qeyb galka xubnaha Guddiga Dhexe intooda badan.

Fadhiga 6aad ee Guddiga Dhexe Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed waxaa sharaf iyo tixgelin u ah ka soo qeybgalka ay nagala soo qeyb galeen xubno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, Golaha Shacbiga Qaranka, waxaana furitaanka fadhigan si rasmi ah u furay Jaalle Aadan Maxamed Cali Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Golaha Dhexe XHKS. kana soo jeediyey kaalmaddii hoggaamineed ee Xisnimo. Waxaa kaloo muddadii uu fadhigu socday heeso qiiro gelin waddannimo leh ka qaadaayey Kooxda Danan ee Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed.

Fadhigii muddadii dhowrka maalmood ahayd ee uu socday wuxuu hawlihiisa u gutay si habsami ah oo ay ku dheehan tahay Kacaannimo, waddannimo iyo firfircooni howlkarnimo. Waxaa si quman oo aan mugdi lahayn loo dhuuxay loona dersay warbixinnada hawlihii Guddiga Fulinta, Kormeerka iyo Baarista UDHKS ee muddadii u dhexeysay laba fadhi, waxaa kaloo xubnaha Guddiga Dhexe ka doodeen Barnaamijkii shirweynaha 2aad UDHKS ee 1983da, kuna doorteen Guddiyadii maamuli lahaa hawlihiisa.

Fadhiga 6aad UDHKS wuxuu fadhiyadii ka horreeyey kaga duwan yahay asagoo ku soo beegmay waqti uu dalka ku sugan yahay marxalad adag oo Ummadda Soomaaliyeed heegan u tahay kuna hawlan tahay Daafaca Dalkooda iyo adkeynta Midnimadooda, taasoo ka dambeysay weeraradii is daba joogga ah sida joogtada ah ay dalkeenna ugu hayaan Gumeysiga Xabashida iyo Xulufadooda ay horreedka u yihiin Ruushka iyo Kuubaanka.

Ujeeddadiisuna tahay isku ballaarinta mandaqada Geeska Afrika, hase yeeshee weeraradaas gardarrada ah waxaa gaashaanka u dhigay Ciidammada Geesiyiinta ah iyo Dadweynaha Soomaaliyeed oo isku kaashada kuna dhaartay inaan ciidooda cadow ku caweynin.

Fadhiga 6aad ee Ururka Dhallinyarada K. Soomaaliyeed wuxuu kaloo kaga duwan yahay fadhiyadii ka horreeyey inuu qabsoomay waqti dhowr bilood laga joogo qabashadii shirweynihii 2aad ee XHKS oo ay ka soo bexeen go'aanno dhaxal gal ah kuwaasoo saameeyey dhammaan dhinacyada, Siyaasadda, Dhaqaalaha, Nabadgelyada iyo Bulshada.

Kana ambaqaadaayey xaaladaha iyo waayaha cusub ee dunida, gaar ahaan dalkeenna Hooyo. Waxaa kaloo xusid mudan in fadhigu ku soo beegmay waqti ay dadweynaha Soomaaliyeed diyaar u yihiin adkeynta midnimada iyo ka hortagga cadow kasta oo isku daya waxyeeleynta qarannimadooda laguma xad-gudbaanka ah.






Digitized by Google

Fadhiga 6aad ee Guddiga Dhexe ee UDHKS wuxuu ahmiyad-ballaaran iyo daraasad dheeri ah siiyey dhaqdhaqaaqa siyaasadeed iyo nabadgelyo ee adduunka gaar ahaan wuxuu si nuxur leh u guubaabiyey xaaladda murugsan ee Geeska Afrika ee saldhigoodu yahay:-

Iska soo horjeedka Gumeysiga Madow ee Xabashida iyo Qowmiyadaha ku hoos nool oo u dagaallamaaya madaxbannaanidooda Ummadnimo iyo aaya ka talintooda iyo tan labaad oo ah weerarka gardarrada bareerka ah ee Xabashida iyo Xulufadoodu ku hayaan dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya Abaan duu lahana uu u yahay Ruushka oo ujeeddadiisu tahay inuu ku adeegto Gumeysiga Madow oo Gabbalkiisu dhacay, bartilmaameedkiisu yahay inuu isku ballaariyo Gobolka Geeska Afrika iyo Marinka Badda Cas, isagoo u hanqaltaagaya Kaliijka Carbeed ee Ho'onka ku ah shidaalka si cadina ugu xadgudbaya xeerarka iyo qawaaniinta caalamiga.



TAGEERO

— Fadhiga 6aad ee Guddiga Dhexe ee UDHKS wuxuu asagoo huwan shucuurka waddannimo iyo Kacaannimo ee Dhallinyarada-weynta Soomaaliyeed taageero buuxda oo nafhurnimo la garab-taagan yahay una soo jeedinayaa ciidammada Qalabka Sida ee Geesiyaasha ah, kuwaasoo mar kasta jab iyo halaag bada cadow kasta oo u soo hanqaltaaga ciidday-na Hooyo.

— Fadhigu wuxuu taageerayaa go'aannadii shirweynihii 2aad ee XHKS ballanqaadayaana fulintooda buuxda.

— Fadhiga 6aad ee Guddiga Dhexe ee UDHKS wuxuu si buuxda oo wax ku ool ah uga qeyb qaadanayaa halganka ay Dhallinyarada Horusocodka ah iyo dhammaan Xoogagga Dimoqraadiga Adduunka ugu jiraan daryeelka nabadda Xoriyadda Horumarka Bulshada iyo Hantiwadaagga.

— Wuxuu taageero hagar la'aaneed oo hiil iyo hoo ba leh la garab-taagan yahay Shucuurta ku hoos nool dulmiga iyo cadaadiska gumeysiga, ee u Halgamaya Xuquuqdooda sharciga ah iyo aaya ka talindooda, sida Soomaali Galbeed, Abbow, Eritereeya, Falastiin Naamibiya iyo Koonfur Afrika.

CAMBAAREYN

— Fadhiga wuxuu cambaareynaayaa tabaha foosha xun ee ay gumeysatada madow ee Xabashida iyo Xulufadooda sida Xaaraanta ah isugu baheysteen kulana kacayaan Dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka Geeska Afrika.

— Waxaanu cambaaraynaynaa faragelinta iyo isla weynida Ruushka gaska iyo qalaanqalka ka wada gobolkan.

— Fadhigu wuxuu cambaareynayaa ku xad-gudubka bareerka ah ee ay Yuhuudda kula kacday dalka Ko'ta ah ee Lubnaan iyo daandaansiga joogtada ah ee ay kula kacaayo Waddammada Carbeed ee Khaliijka.




Digitized by Google

# Jaalle Aadan Maxamad Cali oo qaabilay Xoghayaha Guud ee Baarlammaannada Afrika

Muqdisho Jannaayo. Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibadda Golaha Dhexe XHKS Jaalle Aadan Maxamed Cali, wuxuu Xarunta Dhexe ee XHKS ku qaabilay Xoghayaha Guud ee Baarlamaannala Afrika Mr. Somuel Kouane.

Guddoomiyuhu wuxuu si diirran ugu soo dhaweeyey Xarunta Dhexe ee XHKS. wuxuuna si wacan ugu sharraxay taariikhda Xisbiga, sababihii keenay in uu yimaado in Xisbigu kelidii dalka ka taliyo, wuxuuna u qeexay dhibaatadii iyo jaho wareerkii ay dalka ku rideen Axsaabtii boqol ku dhawaadka ahaa ee dalka ka jirtay Kacaanka ka hor iyo siday shacbiga Soomaaliyeed oo aan qaadan karin u qeybiyeen.

Guddoomiyuhu, wuxuu kaloo u faah-faahiyey asalka dhibaatada Geeska Afrika ka taagan, wuxuuna sheegay in gumeystada Xabashidu ay weerarro caddaan ah ku soo qaadday dhulka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, wuxuuna intaas raaciyey in Xabashidu malaayiin qofood oo Soomaali ah ay ka soo eriday dhulkoodii ay jeclaayeen, dhulka JDS ayeyna maanta ku sugan yihiin, waxa ay la soo carareen waa dhibaato la baday ee dalxiis uma joo-



gaan ayuu yiri Guddoomiyuhu.

Wuxuu Guddoomiyuhu intaa ku daray in Dowladaha waaweyni ay qaarkood qasayaan arrinta Geeska Afrika.

Guddoomiyuhu wuxuu kaloo yiri, waxaa loo baahan yahay in siyaasiyiinta Afrika, Aqoonyahannada Afrika iyo waxgaradka Afrikaba ay ku fekeraan sidii xal loogu heli lahaa dhibaatada gumeysigu uga tegay ee ayan eegan sidii gumeysigu ugu dhiibay».

Guddoomiyuhu wuxuu intaa ku dhaafay in Xisbigu soo dhaweynayo tillaabo kasta oo Afrika isu soo dhaweyn karta. taas ayaana keentay in Xisbigu ku biiro Axsaabta Hantiwadaagga Afrika. Soomaaliyana ka mid noqoto dh..i.. maan Ururrada Afrika.

Ka dib waxaa hadalkii qaatay Mr. Somuel Kouame, wuxuu ka mahad naqay sida wacan ee loo soo dhaweeyey, wuxuuna sheegay inuu indhihiisa ku soo arkay weerarrada Xabashidu ku soo qaadday Soomaaliya, iyo dhibaatooyinka Qaxootiga, wuxuuna yiri waa arrin u baahan in Afrika nabad ku xalliso, kala qeybinta gumeysigana Afrika ka digtoonaato.

Wuxuu kaloo sheegay in Soomaaliya horumar xoog leh ay samaysay intii Kacaanku jiray.



Digitized by Google

# Arrimaha Dunida

## Warkii Caddaa ee XHKS & Xisbiga H/Wadaagga Talyaaniga



Iyadoo uu martiqaad u fidiyey Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre ayaa waxaa 6dii Jannaayo 1983dii booqasho rasmi ah ku yimid Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya wafdi ka socday Xisbiga Hantiwadaagga Talyaaniga ee uu hoggaaminayey Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Talyaaniga Jaalle Bettino Craxi. Wafdigaasi waxaa qaabilay Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Siyaad. Wuxuuna wafdigu booqday muddadii uu joogay meelo ka mid ah dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, oo uu ka mid yahay Gobolka Shabeellaha Hoose.

Intii uu wafdigu dalka joogay waxay wada hadallo la yeesheen madax ka mid ah Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Guddiga Dhaqaalaha ee Dowladda Soomaaliyeed; Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Qaranka iyo Guddiga joogtada Golaha Shacbiga Qaranka.

Wada hadalladii ay yeesheen labada Xisbi waxay bilaabmeen galabnimadii 6da Jannaayo 1983. Dhinaca XHKS, waxaa hoggaaminayey Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, waxaana ka mid ahaa Guddoomiyayaal, Hoggaanno iyo ku xigeennadooda, xagga PSI, waxaa hoggaaminayey Xoghayaha Guud ee Xisbiga PSI, Jaalle Pettino Craxi, waxaana ka mid ahaa xubno kale oo ka tirsan madaxda Xisbiga PSI.

Wada hadalladu waxay ku bilaabmeen jawi aad u wanaagsan ee walaaltinimo, labada Xoghaye Guud waxay wada xuseen baahida loo qabo sii xoojinta xiriirka iskaashi iyo wada shaqeynta ay saldhig u tahay isdhaafsiga wufudda iyo isu xogwaranka.

Qodobbada shirka looga wada hadlay ee ku saabsanaa arrimaha maanta ka taagan dunida guud ahaan, gaar ahaan waxaa la dersay sidii loo horumarin lahaa xiriirka labada Xisbi iyo labada dal; waxayna ku socdeen jawi isku aragti laga yahay dhammaan dhibaatooyinka ka aloosan adduunka.

Hoggaamiyayaasha waxay si buuxda uga wada hadleen arrimaha ay ka mid yihiin dhibaatooyinka ka taagan Geeska Afrika, xaajada murugsan ee Bariga Dhexe, arrinta Namiibiya, Midabtakoorka Koonfur Afrika, xaaladda qalafsan ee Afgaanistaan, wada hadal lada Carabta iyo Yurub, doodda Waqooyiga iyo Koonfurta, Dowrka Axsaabta Hantiwadaagga ah ee Adduunka iyo xiriirka labada Xisbi. Labada Xisbi. Labada Xisbi iyagoo si



Digitized by Google

mug iyo baaxad leh uga baaraan degaya arrimahaas oo leh dabcera siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo nabadgelyaba oo dan u ah guud ahaan adduunka ayey soo saareen baaqan:-

Xisbiga Hantiwadaagga Talyaaniga iyo Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyagoo caddeynaya sida ay uga walaacsan yihiin xaaladda murugsan ee gobolka Geeska Afrika waxay isla gaareen in uu yahay meel ay ka taagan tahay dhibaato ba'an, uuna ka mid yahay meelaha ay ka jiraan dhibaatooyinka waa weyn ee dunida, taasoo ka dhalatay shucuubta Gobolka oo ku jira halgan xaq ah oo waddani ah kuna doonayaan madaxbannaanidooda iyo siyaasadda ku dhisan xoogga ay kula dhaqmeyso dowladda Itoobiya shucuubtaas.

Gobolkan oo muhimad gaar ah ku leh xagga istaraatiijiyada ayaa keentay in xoogagga waa weyni dareeyaan soona faragelivaan xaaladda u gaarka ah oo la rabaa in ay iskood go'aan uga gaaraan ummadaha ku dhaqan gobolkan waana in la dhowraa madaxbannaanida iyo qarannimada dowladaha gobolka. Waxaana murgiyey aadna u sii holciyey xaaladda gobolkan joogitaanka ciidammada Kuuba, Ruushka, iyo Xulafadooda reer Yurub iyo Carabta, waxayna labada Xisbi isla garteen in lagu xallin karo dhibaatadaas oggolaanshaha aaya ka talinta shucuubtaas iyo in ciidammada shisheeye ka baxaan gobolka. Sidoo kale in dowladaha nabadda jecel xil gaar ah iska saaraan xal u helidda dhibaatadaas, gaar ahaan waxay labada Xisbi ugu muuqataa in Axsaabta Hantiwadaagga ee Yurub iyo kuwa Afrika ay ka qaadan karaan kaalin wax ku ool ah si xal waara oo caadil ah loogu heli lahaa.

Waxay labada Xisbi u arkaan in arrinta Qaxootigu tahay dhibaato culus loona baahan yahay in si deg deg ah wax looga qabto si loo helo xal caadil ah, laguna badbaadiyo malaayiinta qof ee laga soo eryey guryahooda maantana ku nool darxumo, arrintaasi murugsan wuxuu xil weyn ka saaran yahay dhammaan shucuubta nabadda iyo xurriyadda jecel.

XHKS iyo PSI waxay u arkaan in dhibaatada Bariga Dhexe lagu xallin karo iyadoo la aqoonsado xaqa shacbiga Falastiin u leeyahay madax bannaanidiisa iyo in uu yeesho wadan iyo dowlad xor ah, taasoo saldhig u ah nabadda iyo ammaanka shucuubta ku nool gobolkaas.

Iyadoo labada Xisbi mabda' ahaan aaminsan yihiin in ummad kasta xaq u leedahay in loo oggolaado aaya ka talinteeda, islana qireen qiimaha xorriyadda ayey ku baaqeen in Shacbiga Namiibiya xurriyaddooda lagu gaarsiin karo doorasho madaxbannaan oo ay mas'uuliyad qaadan dhawrideeda Qaramada Midoobay iyo Ururka Midowga Afrika, Ciidammada shisheeyana ay ka baxaan dhulkaas.

Labada Xisbi waxay ka soo horjeedaan siyaasadda foosha xun ee ku dhisan cadaadiska iyo midab kala sooca ee dowlad ku sheegga Koonfur Afrika kula dhaqmeyso muwaadiniinta Koonfur Afrika waxayna ku baaqayaan in dalkaas laga dhaqangeliyo siyaasad hoggaaminteedu taabacsan tahay xukun Dimoqaraadi ah ee ka tarjumaya himilada iyo rabitaanka dadka intiisa badan.

Iyagoo qaddarinaya qiimaha weyn ee xorriyadda ummadaha ayey XHKS iyo PSI u arkaan in faragelinta iyo xadgudubka bareerka ah ee loo geystay xorriyadda dadka reer Afgaanistaan oo gef iyo meel ka dhac ku yahay mabaadi'da ku baaqaysa in dowladina dowlad kale arrimaheeda gudaha faragelinin xoogna kula dhaqmin, taasoo halis gelinaysa jiritaanka iyo nabad ku wada noolaanshaha dowladaha adduunka. Waxayna labada Xisbi ku baaqayaan in si deg deg ah ciidammada shisheeye uga baxaan Afgaanistaan, shacbigana loo dhaafo aaya ka talinta iyo maamulka danahooda.

XHKS iyo PSI iyagoo arkaya muhimadda iyo baaxadda weyn ee ay leedahay ka dhameynta isku soo dhaweynta farqiga u dhexeeya Waqooyiga iyo Koonfurta ayey u arkaan



Digitized by Google

inay lagama maarmaan tahay in daacad laga noqdo ku guuleysiga iyo ka jaba gaarista arrintaas oo wada saameyneysa shucuubta adduunka, taasoo ku iman karta marka xal waafi ah loo helo xallinta farqiga weyn ee u dhexeeya xiriirka ganacsi iyo wax isdhaafsiga dhaqaale ee adduunka, lagana wada faa'iideysto kheyraadka dabiiciga iyo teknolojiyada casriga ah.

Labada Xisbi waxay u arkaan in axsaabta Hantiwadaagga ah ay maanta hor taalo waajibaad kaga aaddan mashaakilka dunida, loona baahan yahay inay ka jawaabaan kuna shaqeeyaan kalsoonida iyo taageerada ay ka heystaan dadweynaha adduunka, sidaa awgeed waxay ku guubaabinayaan uguna baaqayaan dhammaan axsaabta Hantiwadagga ah ee dunida in ay xiriirkooda iskaashi iyo aragtiyadooda mideeyaan, si loo xaqiijiyo mabaadi'da nabad ku wada noolaanshaha, sinnaanta iyo tixgelinta bani'aaminimo, waxay kaloo ugu yeeraan axsaabta Hantiwadaagga ah ee Yurub iyo axsaabta Hantiwadaagga ah ee dunida seddexaad, gaar ahaan Afrika in ay yeeshaan iskaashi iyo wada dhaqeyn joogta ah, si ay u ilaaliyaan ku dhaqanka mabaadiida u adeegeysa xorriyadda iyo banii'aadamiga.

Labada Xisbi, XHKS iyo PSI waxay bogaadinayaan xiriirka saaxibtinimo iyo wax wada qabsi ee ay leeyihiin, una arkaan inuu maalin ba maalinta ka dambeysa sii mrio dhalinayo, siina xoogoobayo, si joogto ahna u horumaraayo waxayna labada Xisbi qiimo gaar ah siinayaan ahmiyadda iyo qiimaha ay leedahay iskaashiga, saaxibtinimada iyo wax wada qabsiga dhinac kasta ee Soomaaliya iyo Talyaaniga. Booqashada Xoghayaha Guud ee PSI uu ku yimid dalka JDS waxay sii gaarsiineysaa xiriirkaas heer uu ku gaamuro. Kaasoo keenay in ay ku heshiiyaan inay iska kaashadaan, iskana taageeraan arrimaha siyaasadda, si loo joogteeyana waxay labada Xisbi kala sixiixdeen heshiis Brotokol ee wax wada qabsi iyo iskaashi.



# Shirkii Axsaabta H/Wadaagga Afrika.

Waxaa 3dii ilaa 6dii Disember lagu qabtay magaala madaxda Marooko ee Rabaat shirkii Golaha Guud ee raabidada Axsaabta Hantiwadaagga Afrika, shirkaas oo ahaa Kalfidhigii Afraad ee Golaha guud ayna ka qeyb galeen dhammaan wufuudda matalaysay Axsaabta Hantiwadaagga Afrika ee xubnaha ka ah iyo wakiilo goob joog ahaan uga soo qeyb galay oo ka socday Axsaabta Hantiwadaagga Dimoqaraadiga ah ee adduunka.

**TAARIIKHDA RAABIDADA AXSAABTA HANTIWADAAGGA AFRIKA:**

Fekradda aasaasidda Raabidada Axsaabta Hantiwadaagga Afrika ma aha fekrad cusub oo waxay aheyd mid in muddo ah jirtay, waxaana saldhigeeda lahaa madax Afrikaan ah oo in muddo ah ku baaqayey in la helo Hantiwadaag Dimoqaraadi ah ee Afrikaannimo, kuwaas oo ka kasbaday waayo aragnimo Hantiwadaagga Dimoqaraadiga ee Yurubta. Waxayna dalalkooda u doorteen xagga horu-



Digitized by Google

marka ijtimaaciga Hantiwadaagga Dimoqaraadiga ah. Waana Hantiwadaag dhexdhexaad ah oo diidan Midigta Fog iyo Bidixda Fogba. Waxay xoogga saareen dhaqan-Afrikaanka, Horumarka Fanka, Daraasadda Taariikhda iyo Afafka iyadoo loo dersinayo aragtida Afrikaannimo. Waxay aaminsan yihiin dhaqanka Afrikaanka in uusan ka ahmiyad yareyn dhaqanka Yurubka.

— Waxayna in muddo ah ku baaqayeen in la helo aragti mideysan oo ka dhalatay kuna saleysan waaqaca Afrikaannimo iyo in la dhowro taariikhda, dhaqanka, caadaadka Ummadaha Afrikaanka.

— Waxaana lagama maarmaan ah in Hantiwadaagga ka dhashay maskax iyo rabid Afrikaannimo. Kuwaasu waa kuwii ku baaqay siyaasad Afrikaannimo oo xor ah iyo midnimo Afrikaannimo.

Dagaalka Gumeysiga iyo Midabtakoorka.

— Madaxdii Afrikaanka aheyd ee ku baaqday aragtida Hantiwadaagga Afrikaanka ee Dimoqaraadiga iyo abuuridda Raabidada Hantiwadaagga Afrikaanka waxaa ka mid ahaa:- Siijark Nakruma, Mudibo-kita, Axmed Sikatuuri, J. Nereri iyo Xabiib Burqiiba.

Waxaa abuurmay fekrad ah in Axsaabta Hantiwadaagga Afrika ee xagga aragtida isaga dhaw ay yeeshaan iskaashi iyo ka dhexeeya iyo in loo hawl galo sidii loo mideynta lahaa Axsaabtaas si loo xaqiijiyo caddaalad ijtimaaci ah xagga wax soo saarka iyo qaybsashadada kheyraadka qowmiga ah iyo in loo halgamo sidii loo xaqiijin lahaa xoriyadda iyo madaxbannaanida shucuubta ku jirta isticmaarka midabtakoorka iyo Sahyuuniyadda. Waxaa la qabtay dhowr kulan oo hordhac u ah oo tilmaamaya sidii loo mideyn lahaa Axsaabtaas oo kii ugu horreeyey lagu qabtay Tunis bishii Luulyo 1975kii, kulankaasi waxaa looga dooday laguna falanqeeyey horumarinta dhaqaalaha Afrika, iyadoo looga doodaayey dhinaca aragtida Hantiwadaagga, waxaana ka soo qeyb galay 38 Xisbi oo Afrikaan ah, waxaa kaloo ka soo qeyb galay wakiilo ka socday dhaqdhaqaaqyada Gobanimodoonka Afrika, kulankaas waxaa lagu ballan qaaday in Axsaabta oo dhami u hawl gasho sidii loo xoreyn lahaa shucuubta Afrika ee ku hoos noql gumeysiga iyo in si buuxda loo taageero xaqa shacbiga Falastiin.

Waxaa shir kale lagu qabtay Dakaar oo ah magaalo madaxda Sinigaal 29kii Disember 1977kii, shirkaas oo u Guddoomiye ka ahaa Singor, loogana dooday mashruuca aasaasidda Raabidada Axsaabta Hantiwadaagga Afrika, waxaana halkaas lagu doortay Guddigii diyaar gareynta Raabidada, kaasoo ku shiray Tuunis.

Waxaa kaloo la qabtay shir kale oo lagu qabtay magaalada Dakaar 3dii Disember 1980kii, kaasoo looga doodayey mashruuca Raabidadda.

Waxaa Tuunis lagu qabtay Shirweynihii aasaaska Raabidadda Axsaabta Afrika 26-28kii Febaraayo 1981kii, halkaas oo lagu oggolaaday Cahdiga Raabidadda iyo Qaanuunka gudaha ee Raabidadda Hey'adaha Raabidadda waa sdatan soo socota:

1. Shirweynaha: oo ah Hey'adda ugu sareysa Raabidadda Axsaabta Hantiwadaagga Afrika, kaasoo jiheeya siyaasadda shaqada Raabidadda dhinac kasta, wuxuuna waafaqaa xeerka guud ee Raabidadda, wuxuu kaloo oggolaadaa xubin ka noqoshada Raabidadda ee Axsaabta Hantiwadaagga Afrika wuxuna Shirweynuhu dhacaa labadii sanaba mar sida caadiga ah, haddii loo baahdo Shirweyne aan caadi aheyn waa in ay dalbaan shirweynaha seddex meelood oo laba 3/2 xubnaha ku jira Raabidadaas.

2. Golaha Guud. Wuxuu ka kooban yahay Wakiillo ka socda Xisbi kasta oo xubin ka ah, wuxuuna mas'uul ka yahay go'aannada Shirweynaha iyo wax allaale wixii hawl ah ee loo baahdo xagga siyaasadda iyo dhaqaalaha, Golaha Guud iyagoo mas'uuliyadda haya labada Shirweyne inta u dhexeysa, iyagoo waafaqa Miisaaniyadda Raabidadda. iyagoo dersa warbixinnada Kalfadhiyada, waxayna shirraan laba jeer sannadkiiba.

3. Xafiiska:- Raabidadda Axsaabta Hantiwadaagga Afrika Xaruntiisu wa xay ku taalaa magaalada Tuunis, wuxuuna ka kooban yahay Guddoomiyaha Raabidadda, seddex Guddoomiye ku xigeen iyo Xoghayaha Guud.



Digitized by Google

# HIDDAHA & DHAQANKA

## Guud marka suugaanta Soomaaliyeed

— Axmed Cartan Xange —

Sanooyinkii 1979—1980 qoraha qodobkani wuxuu isku deyey in uu sameeyo guud mar ku saabsan suugaanta Soomaaliyeed, tii qadiimka aheyd iyo tan cusubba.

Hawshaas waxaanu si tifaftiran kaga faaloonay dhawr qodob (articles) oo qaarkood lagu faafiyey wargeyskii HALGAN ee XHKS ee soo bixi jiray sanooyinka kor lagu soo sheegay. Sargooyo kala duwan bay lahaayeen qodobbadaasi, sida:

1 — Noocyada Maansada Soomaaliyeed.
2 — Waayaha Ilbaxnimada Soomaaliyeed
3 — Suugaanta Kacaanka
4 — Jilayaasha ku jira qoraallada Fanka
5 — Adeegsiga Suugaanta hub-ahaan iwm.

Arrimahaasi ma aha kuwo si sahlan loo lafo guri karo, waxayna u baahan yihiin in goobid iyo waqti dheer loo huro oo dood cilmiyeysan laga furo arrin walba.

Indhawaale, siiba intii la qoray afka hooyo, waxaa jiray ilaaqo kulul oo dhexyiil indheergaradka Soomaaliyeed siiba Suugaan-dhaariyada. Waxaa la isweydiiyey:

b — Waa maxay Suugaani?
t — Suugaanta Soomaaliyeed maxay ka kooban tahay?
j — Waxatka Suugaantu waa maxay?
x — sidee loo qiimeeyaa Suugaan-yahanka Soomaaliyeed, kii waagii hore iyo kan waaganba — mid walba ma Abwaan baa? iwm.

Waa lagu kala taagan yahay warcelinta weydiimahaas, maxaa wacay isku aragti lama wada aha. Annagu aragtidayada ku saabsan arrimahaas waxaannu kaga faalloonay, sidii aanu kol hore u niri, qodobbada kor lagu soo sheegay (ugu yaraan 8) oo qaarkood HALGAN lagu faafiyey.

HALGAN wuxuu ahaa Wargeys kaalin weyn ku leh baahinta aqoonta iyo isgaarsiinta wararka dalka iyo dunidaba, aad baana loo tebey kaalintiisii intii uu ka maqnaa suuqa. Soo nooleynta wargeysku guul soo hoyatay bay u tahay akhristayaalkii la xiriiri jiray. Qodobka sargooyada sare leh buu qorahani ku soo dhawaanayaa soodhibib-kaca wargeyska Halgan iyo horumarna u rajeynayaa 1983.

Qodobkii waa kan seddexdii qeybood ee ugu dambeeyey qodobbadan taxan waxaanu kaga faalloonay jilayaalka ku jira qoraallada fanka, iyadoo fiiro gaar ah la siinayo lafa gurka Suugaanta Soomaaliyeed, tii qadiimka aheyd iyo tan cusubba. Waxaa la is weydiin karaa, in ay jirto suugaan Soomaaliyeed oo qadiin ah iyo mid cusub, haddii dhab loo fiiriyo macnaha runta ah ee erayadaas. Waxay nala tahay in weydiintaasi, oo muddadan dambe ku wareegeysay xiska suugaanleyda Soomaaliyeed, meesha ku jirto, ayna habboon tahay in aynu goobno warcelin u qalanta weydiintaas. Qoraha qodobkani kol hore buu iskiis uga warceliyey weydiintaas lama huraanka ah, waxaanuna akhristaha daneynaya u tilmaameynaa doodyadii lagu soo shaaciyey Halgankii Abiil 1980. Haddii aanu ku soo noqonno jileyaalka qoraallada suugaanta, ama fanka guud ahaan iyo doodii ku saabsaneyd arrintaas, waxaanu door bidnay in aanu sii iftiimino arrimo aanu ku soo hadal qaadnay qodobbadayadii hore (eeg qeybta VI iyo VII ee 31.9.80 iyo 11.11.80) asiise aanaan dhab uga bogan. Sida akhristuhu, malaha, ku arkay lafagurkayagii arrintani waa mid ka sibiibixanaysa garashada qofka, wejiyo badanna leh; sidaas awgeedna u baahan in laga iftiimiyo dhinac kasta.

Tobaneeyadii sano ee u dambeeyey qarnigan dood kulul baa ka dhex furantay suugaan-yahannada dunda, taas oo ku saabsaneyd kaalinta



Digitized by Google

geesiga ama jilaha ku jira qoraallada suugaanta, iyada oo suugaan-yahannada qaarkood taageerayaan doorka jilidda ee geesiga, qaarkoodna dhaliilayaan oo muujinayaan daldaloolkiisa.

Kala duwanaanta aragtidaas waxaa ugu wacan suugaan-dhaariyada jooga waqti gan oo ku kala taagan fiirooyinkooda faneed guud ahaan. Tusaale ahaan: Haddii aad sameysid sawir-gacmeed shimbiri ka muuqato si sahlan baa loo aqoonsan karaa xiriirka ka dhexeeya sawirkaaga iyo nafleyda sawirku ka joogo. Dhinaca kale, haddii aad sameysid, sawir tusaya dhawr diilimood oo isweydaarsan ama isdabargudubsan oo midabyo iyo qaabab wada sirgaxan leh oo aad waxaas ku sheegto heerkii ugu sarreeyey ee hawl faneed, waxaa muran la'aan kaa maqan daliilkii ama xaqiiqadii lagu rumeysan lahaa dooddaada. Haddii falkeennu uusan salka ku hayn xaqiiqada, ama u dhaweyn runta nolosha falkaasi macne malaha. Qofka waxaa qiimeeya bulshada uu ku dhex nool yahay, waxqabadkiisuna. I- ahaado xagga tacabka ama xagga naftee, waa in uu wax ku ool u noqdo bulshadaas.

Maansada Soomaaliyeed, tii qadiinka aheyd iyo habkeeda cusubba, jilaha suugaantu wuxuu yeelan karaa qaab muuqda ama mid dahsoon; sida gabayaaga ama qoruhu hadba door moodo. Tusaale ahaa, gabayga Sayid Maxamed waxaynu ku aragnay in uu ku hal qabsaday Xuseen-Dhiqle (eeg qeyb IV ee qdobbadayadii), kaas oo ahaa, sidii aannu ku sheegnay meel kale, gacanta midig ee ammaanduulaha daraawiishta, la taliyaha iyo xog ogaalkiisaba. Halkan Xuseen wuxuu ka cayaarayaa door jile ee qoraal suugaaneed, kaas oo ah wax aan jirin ee gabayaagu aloosay, in kasta oo Xuseen jiro qof ahaan:

Xuseenow caqligu kaama tago

Idam Ilaaheeye...

Tixdan waxaa ku jira qiiro iyo kalgacalo qoto dheer leh ee Sayidku u qabay Xuseen-dhiqle, taas oo Xuseen ka dhigaysa ruux loo han weyn yahay; isagana huwineysa dharkii muxubbada ee maansada Sayidka, isla markaana ka dhigaysa geesiga ka dhex muuqda hawl suugaaneed, ama farshaxan, oo ka duwan Xuseen dhiqlihii qofka caadiga ahaa. Jilaha noocaas ah ee ku jira suugaanta Soomaaliyeed siiba maansada marar badan wuxuu yeeshaa qaab nafley kale sida faras dheereeya, hal madi ah ee la jecel yahay, iwm. Haddii la eego qoraallada suugaanta, sida riwaayadaha, sheekooyinka gaagaaban iyo noocyo kaleba. jileyaalka ka shaxaya qoraalladaas waa kuwo la aloosay oo ku nool male-awaalka qoraha.

Suugaanta cusub ee Soomaaliyeed, siiba tiraabka, waxaa ka muuqda daldalool joogto ah, oo ay sabab u tahay karti la'aanta qorayaalkeenna badidood, kuwaas oo aan aalaaba si tifaftiran u muujin jileyaalkooda. Tusaale ahaan, waxaa la arkaa in qoruhu ina tuso aragti guud ama maluug ga jileyaalkiisa sida weerahan oo kale: «... Bile wuxuu lahaa shan carruur ah, mushaharkiisu waa yaraa; sidaas awgeed korintoodu dhib weyn bay ku aheyd....». Akhristuhu wuxuu qoraha erayadaas uga baahnaa in uu tilmaan intaas ka badan ka siiyo carruurta Bile. intee jir weeye iyagu, intee wiilal intee gabdho ah, intee dugsi tagta? iwm. Haddii qoruhu ka war celiyo weydiimahaas waxaa dhab u muuqanlaheyd dhibta dhaqaale ee heysata Bile iyo sheeka-nololeedda xaaskiisa. Laakinse qoruhu wuxuu akhristaha siiyey guudmar keli ah oo ku saabsan dhibta dhaqaale ee Bile; taasina soo jiidan mayso danqashada iyo garowshaha akhristuhu u qabi lahaa jilaha sheekada ama Bile; maxaa wacay, runta nolosha baan si wacan oo ebyan loo muujin.

Farshaxanku guud ahaan waa ku dayasho ama jilidda nolosha runta ah; sida ku dayashadaasi ugu dhowdahay nolosha dhabta ah buu ru i. noqonayaa farshaxankuna.

Sidaa awgeed farshaxanku waa inuu leeyahay maskax furan oo dareemi karta dhinacyada kala duwan ee nolosha, qaab kasta ha ku muuqatee; haddii kale waxa farsha-



Digitized by Google

xanluhu alooso ma muujin doo naan runta nolosha.

Jileyaalka ku jira farshaxanka qoraallada ah iyo suugaanta waa afhayeenka qoraha ee suura gelinaya in uu la hadlo akhristayaasha, laakin waxaa jira in afhayeenkaasi leeyihiin fiiro iyo aragti u gaar ah iyaga, oo ka duwan tan qoraha.

Mararka sidaas ah qoruhu gar uma laha in uu fiiradiisa ku san-dulleeyo jileyaalkiisa ee waa in uu arrinta... ...geysiiyo akhristaha. Maxaa wacay, ujeeddada qoruhu u aloosay hawshiisa farshaxaneed sidii aanu u niri kol hore, waa muujinta runta nolosha; taas oo aan isku si loo wada arkin. Qoruhu wuxuu awoodaa, in kastaba in uu saxo ama dhaliila aragtida jileyaalkiisa haddii uu muujinayo gefkooda ka horjeeda runta nolosha. Buugga la yiraahdo «WAR AND PEACE» (COL IYO NABAD) ee uu qoray Lev Tolstoy waxaa ku jira boqollaal jileyaal ah, oo kulligood door ka ciyaaraya sheekadaas oo ... mid ah hawlaha suugaanta ee lagu curiyey adduunka oo idil kuwa ugu wacan. Markii uu isu keenay jileyaal sidaas u tiro badan oo muujiyey aragtidooda, rajadooda iyo himiladooda Tolstoy wuxuu ina tusay sawir nololeed oo buuxa oo ku saabsan noloshii bulshada Ruushka ee qarnigii 19aad. Halkan qoraaga weyni wuxuu kaga hadalsiinayaa oo inooga warramayaa jileyaalkiisa, kuwaas oo noloshooda inaga tusaya dhinac kasta. Farshaxn-yahanno tiro yar baa awoodi kara in ay sida Tolstoy dhinac kasta ka eegaan nolosha qofka iyo bulshadiisa, si runtu ku soo shaac baxdo.

— Cabdullaahi Maxamed Jaamac —

# Cilmi Baarista.

Marka taariikh ahaan laga hadlo, cilmi baaista waxay la fac tahay jiritaanka banii'aadamka. Intuu baniiaadam jiray, cilmi baarista waa jirtay, inkastoo ay mar waliba soo mareysay heer. Heerarkii u horreeyey cilmi baarista waxay ahaayeen kuwii la xiriiray garashada dabeecadda degaanka lagu nool yahay; waxayna ku saleysneyd ka jawaabidda su'aalo xilligaas taagnaa (dabka, qorraxda iwm.), wuxuuna ahaa xilli garasho oo uusan ka faa'iideysi la socon. Waxaa xusuus mudan in cilmi baaristaas ay wadeen dad iskood u jeclaa aqoon kororsi iyagoon dan shakhsi ah ka laheyn. Dadkaas iyaga waxtar ay heleen iska daayoo waxay marar dadan la kulmi jireen cadaadis uga imaanayey dhinacyada siyaasadda iyo Diintaba.

Markii laga soo gudbay qarniyadii mugdiga ahaa waxaa bilaabantay in la aqoonsado waxtarka cilmi baarista u leedahay horumarka bulshada dhan kastaba dhaqaalaha, siyaasadda, teknoloji iwm). Taasi waxay keentay in loo soo jeesto cilmi baarista lana siiyo ahmiyadda iyo mudnaanta ay leedahay. Horumarka teknoloji, dhaqaale iyo bulsho oo ay ummadi gaarto waxaa lagu cabbiri karaa hadba heerka cilmi baaristeedu gaarsiisan tahay. Tilmaan ahaan haddii aan u soo qaadanno kharajka kaga baxa cilmi baarista waddamada horay ugu maray xagga waxbarashada wuxuu gaarayaa ilaa 2% wax soo saarkooda guud (W.S.G.); isla kharajkaas ma dhama 0.25% waddamada soo koraya. Taasina waxay na tuseysaa haadaanta u dhexaysa dalalka soo koraya iyo kuwa horay ugu maray teknolojiyada.

QALABKA LOO ADEEGSADA

CILMI BAARISTA:

Cilmi baaristu waxay soo martay habab badan oo lagu fuliyo. Ugu horreyntii cilmi baaruhu wuxuu adeegsan jiray oo qura ixsaaskiisa xagga maqalka, aragga, taabashada iyo caqli dheeriga ah oo uu u dhashay. Taasi waxay keeni jirtay:-

— Qaladaad badan oo ka yimaada adeegashada ixsaas.

— Dood iyo waqti dheer oo ku luma cilmi baaris kasta.

Heerarkaas waxaa xigay mid dhexe oo uu bani-aadamku adeegsan jiray qalabka dabiiciga ah ee ku hareereysan, sida dhagxaanta, geedaha, dabka iwm.

Waxaa u dambeeyey heerka hadda lagu jiro oo ah mid cilmi baarista loo adeegsado qalab casri ah qaladaadkii-



Digitized by Google

suna yar yahay isaguna ka dhashay cilmi baaris qoto dheer.

QEYBAHA CILMI BAARISTA

Cilmi baaridda waxaa loo kala saaraa labo qeybood.- Mid waxaa la yiraahdaa aasaasi, midda kalena waxaa lagu magacaabaa cilmi baarid bartilmaameed leh.

Tan hore ee ah aasaasiga waxay la socotaa mar walba waxbarashada heer jaamacadeed, waxayna ka dhalataa hawl maalmeedka xarumaha waxbarasho, waxay af u yeeshaa maskaxda barashada Jaamacadaha, ardaydana waxay awood u siisaa in ya wixii ay ku barteen aragtida ay arkaan iyaga oo fal galaya.

Haddii la soo gaabiyo danta cilmi baaridda aasaasiga ah waxaa la oran karaa waxay tahay sahlid waxbarid iyo aqoon kordhinta oo ay saldhig u noqoto.

Sidaa darteed cilmi baaridda aasaasiga, waa kobcinta aqoonta guud ee banii'aadamka iyo xoojinta waxbarashada heer Jaamacadeed.

Cilmi baarista bartilmaameedka leh waa mid natiijadeeda kama dambeysta ah loogu tala galo ama lagu fuliyo in ay xallin karto mashaakil bulsho ama dhaqaale oo taagnaa. Cilmi baarista noocaas ah waxay kaloo suurtagelin kartaa ka gudbidda dhibaato dabeecadda keentay ama ka faa'iideysi shay dabiici ah sida (hawada, qorraxda, badda, webiyad iwm).

Sidaa darteed ma jiri karo horumar dhaqaale iyo mid teknoloji haddii aan la sameyn cilmi baaris bartilmaameed leh.

Waxaa tusaale noqon kara in hey'adaha dhaqaale ee dalalka horay u maray ay caadeysteen in ay u adeegsadaan jaamacadaha wixii cilmi baaris ah oo la xiriira horumarka waxbarashadooda. Arrintaas waxay jaamacadda u soo hoysaa horumar aqooneed iyo qalab casri ah. Warshadahana horumar dhaqaale iyo magac.

KAALINTA CILMI BAARISTA KA QAADATO WAXBARIDDA:

Waxbarasho horay uma socoto haddii ayan cilmi baaris bar bar socon, waxbarashada noocaas ah waxay noqotaa mid dhaqso u qabowda aan lana socon karin isbeddelka nolosha banii'aadamka u baahan yahay.

Kaalinta cilmi baaristu ka qaadan karto waxaa ka mid ah:-

— Iyadoo ardayga ay u tusto fal gal ahaan wixii uu aragti ahaan u bartay.

— Kor u qaadidda aqoonta iyo khibradda macallimiinta.

— Isbeddelka iyo cusbooneysiinta manhajka waxbarasho ee Jaamacadeed.

— Kor u qaadidda sumcadda Jaamacadda oo dhalin karta khibrad isweydaarsi Jaamacadaha kale.

— Ka gudbid fikrado cilmiyeed oo gaboobay ama beenoobay.

*Waxaa soo xigtay Cabdullaahi M. Jaamac.*



Digitized by Google

# Khudbaddii Xoghayaha Guud XHKS ee 13 guuradii Kacaanka



JAALLAYAAL,

Waxaan magaca Xisbiga, kan Golaha Shacbiga, kan Dawladda iyo Keygaba, ugu gudbinayaa magaca munaasabadda 21ka Oktoobar oo maanta ah 13-guuradii, u jeedinayaa hambalyo iyo bogaadin, dadweynaha Soomaaliyeed guud ahaan, meel kasta ay joogaan, gaar ahaanna xoogaggan masilaya qaybaha kala duwan ee bulshada, oo dabbaaldeggan ka soo qayb galay.

Waxaan idiinku hambalyaynayaa guulihii waaweynaa iyo waxtarkii qaayaha lahaa aad qarankiinna u qabateen, kuwaasoo aan la tirtiri karin. Ilaahay waxaan ka rajaynayaa inuu sanooyinka soo socda idin hantisiiyo guulo iyo baraare.

Muddadii 13ka sano ahayd ee Kacaanka 21ka Oktoobar majaraha maamulka u hayay dalka, waxaa la gaaray guulo wax ku ool ah oo la xiriira dhinacyada Dhaqaalaha, Siyaasadda, Bulshada iyo Dhaqankaba. Arrimahaasi waxay ku tafaftirnaayeen Khudbaddii aan ka jeediyey Shirweynihii 2aad ee XHKS, oo laba bilood ka soo wareegtay, sidaas awgeed, looma baahna in aan ku celiyo, waxaana la helayaa iyadoo qoraal ah.

JAALLAYAAL,

Adduunka maanta waxaa ka taagan, xasillooni



Digitized by Google

la'aan ka dhalatay dhibaatooyin saddex ah; oo isku xidhan, kuwaasoo ah:- Xiisadaha Siyaasadeed ee ka abuurmay qabqab dhaafka iyo seef la boodnimada. Dhibaatooyin dhaqaale, oo ka dhashay isku dheellitir la'aanta xiriirka dhaqaalaha ee Adduunka, iyo gumeysiga oo weli ka taagan meelo ka mid ah dunida, kaasoo ku saleysan cadaadis iyo caddaalad darro. Balse mid kasta aan goonidiisa u dul maro.

Wuxuu Adduunku u ciirciirayaa xiisado siyaasadeed iyo xasillooni la'aan, waxaa kordhay iska horimaadka hubaysan, waxaa badanayana is-afgaran waaga iyo khilaafaadka ka dhex aloosan dawladaha, waxaa gaamuray cadaawadda iyo nacootiga ka dhex abuurmaysa dadyowga, waxaa heer sare gaadhay ku tartanka hubka halista ah, waxaa si bareer ah loogu tumanayaa xeerarka iyo qawaaniinta Ururrada Caalamiga ah, iyo kuwa Goboleedba (Ummadaha Midoobay, Ururka Midowga Afrika iwm). Arrimahaasi waxay khatar gelinayaan degganaanshaha iyo amniga guud ee Adduunweynaha, waxayna u horseedayaan dagaal lagu hoobto.

Goobaha dhibaatooyinkaas Siyaasadeed iyo iska horimaadka adag ka aloosan yihiin, waxaa ka mid ah; Afganistaan, Kamboodiya, Boland, Lubnaan, Khaliijka, Geeska Afrika, iyo kuwo kaleba. Shaki kuma jiro in abuurista mushkiladahaasi iyo damis la'aantoodu salka ku hayso danaha istaraatijadeed ee quwadaha waaweyn qaarkood oo xil weyni ka saaran yahay ilaalinta nabadgelyada guud ee dunida, sida dawladda Midowga Sofiyeeti oo waayahan dambe ku dhaqmaysay siyaasad isballaarin iyo amar ku taaglayn ah. Sida ay na barayso waayo-aragnimada taariikhda bani'aadamku, dagaalladii ballaarnaa ee lagu hoobtay, waxay ka dhasheen qabqab dhaaf, sed bursi raadin, iyo u hanqal taag addoonsi dadyow kale, kuwaas oo dhex marayey dalalkii markaas awoodda isbidayay.

Adduunku wuxuu u dhisan yahay mabda' isu-dheellitirnaanta si kasta oo loo eego. Nolosha aadamiga oo ugu muhimsanina waxay ku taagan tahay mabda'aas. Waxaana cilmi ahaan u sugan in wax kasta oo ay ka lunto isu-dheellitirnaantu uu halaabaayo. Haddaba haddii aan xaqiiqadaas cilmigu tilmaamayo eegno waxaan ogaaneynaa in dagaalladii adduunka ka dhacay oo dhan ay sabab u tahay isu-dheellitirnaan la'aani, ha ahaato dagaallo, tu dhul, tu ciidan, tu hub iwm. Waqtigan xaadirka ah laftiisa waxaan ogsoon nahay inay nabadda adduunku ku taagan tahay mabda'aas isaga ah. Bal ka soo qaad quwadaha waaweyn ee dunida, haddii aanay jirin isu-dheellitirnaani xagga hubka iyo haybadda, ama laxaadkaba nabadi ma jirteen. Haddaba, haddii aynu si khaas ah u fiirino xaaladda mandaqada Geeska Afrika waxaan shaki ku jirin inay quwad weyni ku shaqeynayso in ay ka dumiso mabda'aas. Taasina waa ta keeneysa. dhiirrina gelinaysa duullimaadyada joogtada ah ee dawladda Xabashidu ku soo qaadeyso dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Sidaas darteed waxaan dunida nabadda jecel ugu baaqeynaa, dareenkoodana gaadhsiinaynaa si nabadi uga hirgasho Geeska Afrika in la xaqiijiyo isu-dheellitirnaanta hubka. Sida waayo-aragnimadu ina tusaysana sidaasi waa sida ugu sahlan ee nabadda lagu xasilin karo.

Runtii dhugashada guud ee dhibaatooyinkaas siyaasadeed ee adduunka ka taagan waxay muujinaysaa degganaansho la'aan iyo jahawareer keeni kara dagaal caalami ah oo saddexaad, kaasoo aan saxar ku reebayn dhulka guudkiisa, sababtuna ay tahay horumarka qotada dheer ee laga gaaray teknooloji-

yada iyo sameynta hubka wax lagu baabi'iyo. Waxay noogu muuqataa haddaba, in lagaga bixi karo, dhibaatooyinkaas siyaasadeed ee qarada weyn, sidatan:-

1. Quwadaha waaweyn oo ka soo baxa xilka ka saaran, ilaalinta xasilloonida iyo nabadda adduunka, xakamaynayana danahooda istaraatijiyadeed, ee aan u adeegayn ujeeddadaas, maxaa wacay, Caalamku wuxuu u dhisan yahay hadda, qaab qoysnimo, oo aanay xubnihiisu kala maarmayn, taasoo fadligeedu u noqanayso, horumarka wax ku oolka ah ee laga gaaray isgaarsiinta iyo gaadiidka.

2. Dhawrista iyo habsami u fulinta go'aamada hay'adaha caalamiga ah ee u xil saaran hawlahaas.

3. Is-af-garanwaaga iyo khilaafaadka dhex maraya dawladaha oo lagu xalliyo caqli deggan iyo xilkasnimo, ku salaysan jid nabadeed, lagana digtoonaado seef la boodnimada iyo qori caaradiis oo lagu garsoortamo.

4. Dhimista hubka halista ah.

JAALLAYAAL,

Dhibaatada Geeska Afrika waxay ka mid tahay, kuwii aan soo tilmaamay ee halista gelinayay nabadgelyada adduunka, haddii aan loo helin xal nabadeed oo waara, oo ku dhisan caddaalad. Mushkiladdan salkeedu waa Gumeysiga Xabashida oo muddo dheer soo taxnaa, lana cumri ahaa gumeysigii Reer Yurub oo dalalkii uu gumeysan jiray u oggolaaday xorriyaddoodii, xiriir iskaashina ka dhexeeyo. Dadyowgii taliskaasi addoonsanayay waxay doorteen halganka hubaysan kaasoo ay u arkayeen jidka qura ee u furan. Waxaa sii ololiyey dhibaatadan Ruushka oo soo galiyay dalka Xabashida hub xad dhaaf ah, ciidammo shisheeye iyo dawlado ajnabi ah oo uu ku adeegto.

Sida muuqata Xabashidu waxay doonaysaa, inay dafirto dagaalka gobannimadoonka ee dhex maraya, iyada iyo dadyowgii ay gumeysanaysay, sida (Soomaali Galbeed, Abbo, Eritereeya iyo Tigree), sidaas awgeedna, ku soo biiriso finoomino degganaasho la'aan Gobolka. Fara gelinta Midowga Sofyeeti ee mushkiladda mandiqada, waxay keentay dhiirrigelinta siyaasad dhul-ballaarsi ee Taliska Mingistu, Abaabulid dagaallo iyo duullimaadyo lagu soo qaado JDS, iyo xasuuqidda dadyowga ku hoos nool taliskaa aan kor ku soo sheegnay.

Sida aad la socotaan taasi waxay ka abuurtay Gobolkan Geeska Afrika, qaxooti fara badan oo ku biiray dalalka jaarka la ah Xabashida. Qaybta ugu badan Qaxootigaas oo lagu qiyaasay Hal Malyuun iyo dheeraad waxay ku soo biirtay dalkeenna. Soomaaliya xil weyn bay iska saartay badbaadinta iyo daryeelka dadkaas walaalaheeda ah, inkasta oo culays gaaray dhaqaalaheeda. Waxaa gacan naga siiyey daryeelka Qaxootiga Dawlado aynu saaxiib nahay, Ururro sama-fal Caalami ah, iyo shakhsiyaad, kuwaasoo aan mahad u celinayno.

Ciidammada Qala-bka Sida ee Soomaaliya iyo Shacbiga Soomaaliyeed, oo isku tiirsan, waxay si buuxda oo geesinnimo ah u guteen waajibaadkooda muqadaska ah ee Daafaca Dalka Hooyo. Inkasta oo uu cadowgu ka tiro badnaa isticmaalayayna qalab casri ah, khubaro shisheeye ah oo ku xeel dheer habka dagaalka, hase yeeshee Ciidankeennu wuxuu siiyay casharkii looga bartay ee taariikhiga ahaa, kuwa ka mid ah qaraarkiisana aanu cadowgu illaabi doonin. Waxaan u sheegaynaa Caalamka in mu'aamaraadka iyo dagaallada laga aloosayo Geeska Afrika aanay ahayn dhibaatadeedu, tu ku ekaanaysa Soomaaliya oo keliya ee ay u gudbi doonto dawladaha mandiqada oo dhan.



Digitized by Google

Sidaas awgeed, ayay lagama maarmaan u tahay in wadciga gobolkan siduu yahay loo fahmo, loogana hortago khatartaas faafayso.

Soomaaliya marar badan ayay caddaysay Siyaasaddeeda ku saabsan mushkiladdan, taasoo ah:

1. In la siiyo dadyowga Xabashidu gumeysato xaqa aaya ka talinta, kaasoo ah jidka qura ee lagu xaqiijin karo nabadgelyo waarta, is afgarad iyo wax wada qabsi.

2. Khilaafaadka dhexyaal JDS iyo Itoobiya, waxaannu aaminsan nahay in aan dagaal xal u ahayn, danina ugu jirin labada dadyow.

Sidaas awgeed, ayaan ugu baaqayaa Taliska Xabashida in ay u dhegaruglaadaan waanwaanta nabadeed ee aan u fidinay, laguna dhammeeyo khilaafaadkaas wada hadallo iyo kulamo, dhex-mara labada dhinac.

JAALLAYAAL,

Waxaa Adduunka maanta ka taagan dhibaatooyin dhaqaale, sida dib u dhaca wax soo saarka iyo sabbaynta lacagaha, sicir bararka, isku dheellitir la'aanta qiimaha alaabta cayriin ee dalalka soo koraya iyo badeecadaha farsamaysan ee dalalka horey u maray iwm, kuwaasoo si gaar ah u saamaynaya dhaqaalaha dalalka soo koraya. Shakina kuma jiro inay dhibaatooyinkaas dhaqaale si laxaad leh u saamaynayaan degganaanshaha Adduunweynaha, maxaa wacay dhaqaaluhu waa saldhigga nolosha bulshada, sidaas awgeed, waxaa habboon in doodda Koonfurta iyo Waqooyiga lagu gaaro tallaabooyin wax lagaga qabanaayo dhibaatooyinkan si loo abuuro hab cusub oo xiriir dhaqaale caalami ah. kuna dhisan caddaalad iyo isu dheellitirnaan.

JAALLAYAAL,

Dhaqaalaheennu isagoo la wadaaga dhibaatooyinkaas kan adduunweynaha ayaa waxaa u gaar ah kuwa soo socda:- Abaarihii isdaba joogga ahaa iyo fatahaaddii biyaha webiga iyo daadadkii roobabka ee dalku soo maray, Qaxootiga xad-dhaafka ah ee la yimid culayska ballaaran, dagaalka iyo weerarka isdaba joogga ah ee Xabashida iyo huwanta xaq darrida isku soo bahaystay nagu hayaan. Dhibaatooyinkaasi waxay dabreen fulinta barnaamijka horumarinta dalka, waxayna dhaliyeen hoos u dhac wax soo saar, sicir barar iwm.

Si haddaba, dhibaatooyinkaas wax looga qabto waxaa lagama maarmaan noqotay in dib loo habeeyo dhaqaalaha Dalka, waxaana la qaaday tallaabooyinka soo socda:-

1. Dib u habeynta ganacsiga Dalka, taasoo lagu laasumiyey ganacsatada in ay maraan nidaamka Bangiyada, lana joojiyey habkii «Franco Valuto».

2. Kor u qaadidda sarrifka lacagaha qalaad, si wax looga qabto xiriirka uu shillinkeennu la leeyahay lacagahaas.

3. Dhiirrigelinta tacab soo saarka iyo ku salaynta miraha beeralayda sicir wax soo saar.

4. Dhimista kharashka Dawladda iyo Hay'adaha, si loo gaaro miisaaniyad isu dheellitiran.

5. Dhiirrigelinta dhoofinta iyo yaraynta keenitaanka badeecadaha laga maarmi karo.

6. Dib u habaynta iyo xoojinta habka ururinta canshuuraha Qaranka.

7. Dhiirrigelinta dhigaalka lacagta iyo dib u habaynta amaah bixinta.

8. Wax ka qabashada mushaharaadka shaqaalaha iyo dhaafidda canshuurta horumarinta.

Dib u habayntaas waxaa ka dhashay natiijooyin wax ku ool ah, inkasta oo aan la gaarin sidii aan wada jeclayn. Waxaa aad iyo aad u kordhay miraha beeraha, waxaa kor u kacay awoodda dhoofineed ee



Digitized by Google

dalka. Waxaa dhashay niyad wax soo saar.

Dib u habaynta dhaqaalaha waxaa lagu dhiirrigelinayaa maalgelinta dibadeed, (Foreign Investment), Soomaali iyo Ajnebi mid kasta ha ahaadee, isagoo aan marnaba cabsi ka qabin hantidiisa.

JAALLAYAAL,

Sidii aan ku caddeeyey khudbadahaygii hore waxaa horumar wax ku ool ah laga gaaray daryeelka caafimaadka dadka iyo xoolaha, Waxbarashada, Caddaaladda, Isboortiga iwm.

JAALLAYAAL,

Iyadoo ay maanta ka soo wareegtay 10 sano markii aan go'aansanay in la qoro Afkeenna 1972, waxaan filayaa in ay mudan tahay bal inaan dib u jalleecno, waxaannu la soconnaa in waxbarashadii afafkii qalaad ee waxbarashada iyo maamulkeennu ku socday ay horumarka dhaqan dhaqaale ee dalkeenna dabrayeen.

Kacaanku isaga oo oofinayay axdigiisii kowaad ee ahaa in la dhiso mujtamac ku dhisan caddaalad iyo shaqo ijtimaaci ah, ayaa 1972kii la qoray Afkeenna Ummadeed, waxaana dalka oo dhan laga billaabay Ololaha la dagaallanka aqoon darrida, iyo kuwii ka dambeeyey ee aad la socotaan.

Hirgelinta qoraalka farta Soomaaliga waxaa ka dhashay:

1. Dad aad iyo aad u tiro badan oo wax akhriyi kara, halkaas oo lala yaabo qofka aan gudbin marxaladdaas.

2. Waxaa abuurmay fac cusub oo ka xoraysan maskaxda.

3. Waxaa la dhisay Jaamacadda Ummadda, waxaana lagu baahiyay dugsiyada waxbarasho magaalooyinka, tuulooyinka dalka oo idil.

4. Waxaa boodhka laga jafay xadaaradeenna, oo hore loo xabaalay, waxaana dhismay xarumo cilmi baariseed, oo ururiya aqoonta guud iyo teknoloojiyada casriga ah, laguna hufo hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

5. Waxaa isu soo dhawaaday Miyiga iyo Magaalada, taasoo ka timid aqoonta lagu baahiyey Miyiga.

6. Waxaa lagu habeeyey manhajka waxbarashada dalka, baahida mujtamaca ee kordhinta wax soo saarka.

Waxay ila tahay inaan qodobkaas ku soo ururiyo in maanta uu maraayo heerka Jaamacadda wax looga barto, taasoo ah tallaabo taariikhi ah, muujinaysana xorriyadda shacbiga Soomaaliyeed ka hantay dhinacyada isbeddelka maskaxda iyo waxbarashada.

JAALLAYAAL,

Sida aad la socotaan Afka Carabigu waa luqada kale ee rasmiga ah ee dalkeenna, sidaas awgeed, waxaa Kacaanku qaaday ololayaal isdaba joog ah ee lagu baahinayo barashada Luqada Afka Carabiga. Waxaa la kordhiyey xisadihii Luqadda Carabiga ee Dugsiyada Sare iyo Dhexe ee Dalka, waxaa la furay Kulliyadaha Saxaafadda iyo Luqadaha ee lagu barto afkan, waxaana laga baahiyaa Idaacadda iyo filimada. Taas macnaheedu waxaa weeye, in Kacaanka 21ka Oktoobar sida uu isaga xil saaray hirgelinta qorista farta Soomaaliga uu isaga xil saaray baahinta barashada Afka Carabiga, guud ahaan natiijooyin fiican ayaa laga gaadhay tan iyo hadda barnaamijka baahinta afka Carabiga. Waxaana filayaa in dalalka Carbeed ee naga dhaqaalaha rooni gacan nagu siiiin doonaan dhammeystirka waxyaabaha dhimman.

JAALLAYAAL,

Mowqifkeenna ku saabsan siyaasadda adduunka, waa mid ku salaysan aasaas mabdi'i ah, oo ah siyaasadda wax ku oolka ah ee dhexdhexaadka, nabad ku wada noolaanshaha, ku xallinta xiisadaha ka dhex oogan dawladaha iyo shucuubta ku dhaqma habab bulshadeedka kala duwan, wada hadallo iyo is-afgarad ku dhisan is-qaddarin iyo is-tixgelin, xaq dhawridda Qarannimada iyo madax-



Digitized by Google

**bannaanida dalalka xorta ah iyo in la siiyo dadyowga la gumeysto xaqa aaya ka talinta.**

Waxaa la yaab leh warkii caddaa ee Mingistu iyo Brishneef ka soo saareen Moosko oo ay ku sheegeen in Maraykanku saldhigyo milleteri ku leeyahay gobolka Geeska Afrika meel kasta ha ahaatee; markaan runta ka sheego annagu saldhig aan siinnay Maraykanka ma jiro. Waxaa yaab leh inay jiraan saldhigyo aad u fara badan oo Itoobiya gudaheeda Rushku ka sameystay oo uu u sameystay in waddammada kale u khalkhal ku geeliyo.

Adduunka maanta sir uu gaari weynayo ma jirto, saldhigyo meeshay ku yaalliin waa la yaqaanaa, ujeeddada focsha xun ee uu ka leeyahay waa la yaqaan, waxaan rajeynayaa in ummadaha ku nool mandiqaddan Geeska Afrika, Khaliijka ama Afrika geesaheeda kale ku wareegsan inay arrintaas si dhab ahaan ah u fahmaan, si wax garadnimo ah oo caqliyaddu ay hoggaaminayso uga tashadaan, sidii ay isaga daafici lahaayeen, maxaa wacay waa saldhigyo loola jeedo in waddammadooda lagu khalkhaliyo, looga duulo oo lagu dumiyo.

Waxaa noo muuqata in muddooyinkan dambe uu ka jiro Afrika firir weyn, khalkhal badan,, iska horimaad iyo jab badan, waxaana u jeedinaynaa madaxda Afrikaanka inay arrintan dib u eegaan, faa'iidadii laga gaaray Ururka Midowga Afrika inaysan lumin, in ayadana caqliga lagu taliyo, wixii qasayana laga dhex saaro, inta kale ee miyirka qabtana inay raadiso inuu nidaamkaasi jiro, danta dadka Afrikaanka ah, taasoo ay niyadda ku hayaan shucuubta dadka Afrikaanka ah qof kasta ha ahaadee.

Dhibaatada Bariga Dhexe waxaannu soo dhaweynaynaa go'aankii shirweynihii 12aad ee Boqorrada iyo Madaxweynayaasha Carbeed, ee lagu qabtay magaalada Fees, ee dalka Marooko. kaas oo aannu u aragno inuu waxtar u yeelanaayo xallinta dhibaatadaas gaamurtay.

Waxaannu u aragnaa mashruuca nabadda ee Madaxweynaha dalka Maraykanka ee Bariga Dhexe, inuu leeyahay dhinacyo wanaagsan oo looga faa'iideysan karo xallinta dhibaatadan.

Dhinaca kale waxaannu cambaaraynaynaa weerarrada Yuhuudda iyo xadgudubka ay ku samaynayso dalka Lubnaan ee xorta ah. iyo xasuuqiddii maatada reer Falastiin, ee ku sugnayd xeryaha Qaxootiga.

Carab waxaa looga faa'iideystay oo dhibaatooyin badani uga yimaadeen la'aanta is-afgarad, is-xormayn iyo daafaca xuquuqda shucuubta Carbeed oo aan shaki ku jirin in kala firirsanaanta maanta jirta ay ula imaanayso dhaawac aad u ballaaran oo dib u dhac u keenaya ummadda Carbeed.

Waxaynu aad uga welwelsan nahay dagaalka muddada dheer dhex marayey labada dawladood ee Muslimka ah, Ciraaq iyo Iiraan, oo dhibaatooyin u keenaya labadaas dal ee Muslimka ah, sidaas awgeed, waxaynu ku baaqaynaa in la joojiyo dagaalkaas, hakinaya horumarka labadaas dal, lagana billaabo wada hadallo nabad raadis ah.

Waxaannu taageeraynaa dadyowga u halgamaya xorriyaddooda iyo aaya ka talintooda sida, Eritereeya, Soomaali Galbeed, Abbo, Namiibiya iyo Falastiin.

Waxaynu qabnaa in guud ahaan shucuubta iyo dawladahooda, arrimahooda gudahaba aan la soo faragelin, sidaas awgeed. waxaynu ku baaqaynaa in laga daadgureeyo ciidammada shisheeyaha dalalka Afganistaan iyo Kamboodiya, loona daayo dadyowga dalalkaas inay aayahooda ka taliyaan.

Ugu dambaystii waxaan mar labaad u soo gudbinayaa hambalyo iyo bogaadin Shacbiga Soomaaliyeed meel uu joogaba, waxaana ku boorrinayaa badinta wax soo saarka iyo adkaynta difaaca nabadgelyada Qaranka.



Digitized by Google

Digitized by Google

Digitized by Google



*Hobollada Dalka waxay had iyo jeer kaalin muuqata ka qaataan ku baraarujinta Bulshada go'aannada Xisbiga iyo Dawladda.*

*(Sawirka) waxaa ka muuqda koox ku howlan maawee-linta dadweynaha.*

Digitized by Google

Digitized by Google

Digitized by Google

Digitized by Google

3 0000 008 425 245

PERIODICAL
THIS DOES NOT CIRCULATE

HECKMAN
BINDERY INC.
AUG 95
Bound-To-Please® N. MANCHESTER,
INDIANA 46962

Digitized by Google